# BIRI-MA-GEYDO

## (LAMA-DILAAN)

*HAB-DHAQANKII SOOMAALIDII HORE EE COLAADDA*



**Ergada qaabilsan Soomaaliya ee**
**GUDDIGA CAALAMIGA AH EE LAANQAYRTA CAS**
**Febraayo 1997**

# Mahadnaq

Daraasadihii ay bilowgii mashruucan soo diyaariyeen taariikhyahannadii Guddiga Caalamiga ee Laanqayrta Casi u xil saartay hawshaas ee kala ahaa Maxamed Cabdillaahi Riiraash, Aw Jaamac Cumar Ciise, Maxamed Xaaji Cumar, iyo Prof. Axmed Kaastro waxaa iyana marka dambe wax ku soo kordhiyey rag dhaqanka Soomaaliyeed aqoon u leh oo ay ka mid yihiin Cabdulle Raage Darwiish, Mustafa Sh.Cilmi, Cabdi-Dhuux Yuusuf Xasan, Cabdulqaadir Oromo iyo Khadar Xasan Cusmaan. Baarayaashaasi waxay sheekooyinka iyo taariikhaha qoraalkan ku xusan iyaguna ka soo xigteen dad kale oo aan halkan lagu soo koobi karin.

Hawsha isku-dubba-ridka iyo sixitaanka waxaa ka shaqeeyey Muuse Yuusuf Xuseen, Maxamed Cabdillaahi Riiraash iyo Ibraahim Xaaji M.Wacays.

Baarayaasha iyo dhammaan dadka kale ee mashruucan baariseed gacanta ka geysteyba waxay Guddiga Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed u soo jeedinayaan ammaan iyo mahadnaq ballaaran.

# Tusmo


Hordhac........................................................ 1

Gogoldhig........................................................ 5

Maxaa kicin jirey colaadaha?........................................................ 11

Hab-dhaqankii dagaallada iyo duullimaaddada........................................................ 23

Biri-ma-geydo........................................................ 27

Ragga la qabto iyo caadada is-bixinta........................................................ 43

Dagaalka iyo hantida dadka........................................................ 47

Dagaalka iyo diinta Islaamka........................................................ 49

Qabiilka u gurmada dhaawaca........................................................ 51

Hubka iyo falalka dagaalka ee reebbanaa........................................................ 53

Heshiiska iyo nabadaynta........................................................ 55

Gebagebo........................................................ 59

# Biri-ma-geydo

## Hor-dhac

Burburkii Jamhuuriyaddii Soomaaliya ku soo gaarey dagaalladii sokeeye ee sida qaraar u jiitamey 1990-ada horraantoodii iyo barakicii qaxootiga ee ballaarnaa ee ka dhacay gudaha iyo debedda xuduudda qarankii hore waxay si naxdin leh u soo if-bixiyeen caadada dagaal-jacaylka ee ku jirta dhaqanka Soomaaliyeed. Dad-laynta sida gaarka ah bahalnimada ugu sifowdey iyo dhibaatooyinka kale ee la geystey muddadii ay socdeen waxyaabihii Soomaalidu u bixisay "qabiil-sifaynta" waxay caasiimaddii hore ee Muqdisho dhaxalsiiyeen sumcad-xumo, taas oo ku dhiirrigelisey wariyeyaal aan xog-ogaal ahayn inay dalka ka bixiyaan sawir guud oo muujinaya gacan-ka-hadal aan xakamaysnayn, cidina xakamayn karin, oo ka dhex socda dad noloshoodu qas ku salaysan tahay, kuwaasoo aan lahayn wax xeerar iyo caadooyin bulsho ah ama qaabab wax-ku-ool ah oo heshiis lagu dhalin karo. Arrintaas macnaha ku qarsoon waxaa weeye in Soomaalidu ay marka loogu qaatey yihiin dad u abuuran inay ujeeddo la'aan birta iskaga aslaan.

Dabcan arrintaasi waa mid runta aad uga fog. Sida meel kastoo kaleba ka jirta, dagaalku halkan wuxuu ku gudo-jiraa hab-dhaqan idil, waxaana xukuma arrimo dhaqameed oo dhinacyo badan leh. Ruux kastoo si dhab ah u danaynaya inuu ka qayb qaato nabadaynta iyo soo-noolaynta siyaasadeed wuxuu u baahan yahay inuu fahan dhab ah u yeesho dabiicadda iyo sababaha keena dagaalka (iyo waxyaabaha u diida inuu fara-ka-bax noqdo) ee ku jira dhqan Soomaaligii hore. Sida ka-qayb-qaatayaashu carrabka ku xejiyeen markay diyaarinayeen qooraalkoodan waqtigii loo baahnaa ku soo beegmay ee ku saabsan sharciyadii loogu talagalay inay xukumaan, mar walbana saamaynayey, habka loo dagaallamayo iyo sida loola dhaqmayo dadka dagaalka lagu qabto iyo dhaawaca, dhaqankan reer guuraanimada u badani waa mid run ahaantii iska-hor-imaadyada hubaysani ay waayadii hore door muhiim ah ka ciyaari jireen. Marka la fiiriyo cilmiga bulshada, waxaa isla markiiba arrintaas laga garan karaa inay jireen (welina si kala heer ah u sii jiraan) xeerar dagaalka xukuma iyo habab heshiiska lagu soo dhoweeyo. Bulshada Soomaaliyeed waxay waayadii hore ragga kala doorransiin jirtey laba door oo la rabey inay kala duwanaadaan misana aan kala maarmi jirin, kuwaas oo kala ahaa waranle iyo wadaad. Wadaaddada xilkoodu ma ahayn oo keliya inay aadanaha iyo Ilaahay u dhexeeyaan, balse waxaa taas u wehelin jirey inay ragga ruuxooda dhexdhexaadiyaan si ay xasillooni iyo nabad-ku-wada-noolaansho uga dhex abuuraan beesha Muslinka ah. Dabcan, waxaa jirey habab kaloo badan oo loo adeegsado soo af-jaridda colaadaha ama ka-hor-taggooda. Gaar ahaan, haweenka la qabo oo iyagu laba dhinac ka wada tirsanaa, reerka ay u dhaxeen iyo reerka ay ka dhasheen (oo inta badan kala duwanaa) waxay ahaayeen kuwa ugu habboon ee u kala dab-qaada qolyaha colaaddu ka dhexayso, doorkaas oo ay ilaa maantaba ciyaaraan. Gabayga oo ilaa hadda si aad ah looga tix-geliyo dhaqanka Soomaaliyeed baa isagana, inkastoo mararka qaarkood loo adeegsan jirey hurinta colaadaha, marar kaloo badanna loo adeegsan jirey sidii nabad loo dhex dhigi lahaa kooxo is haya.

Marka la eego sida faraha badan ee dagaalku uga dhalan jirey loollanka loogu jiro khayraadka dabiiciga ah ee kooban (sida ka-qayb-qaatayaasha daraasaddani faahfaahiyeen), hababkaas dhexdhexaadinta si joogto ah baa loo adeegsan jirey. Waxay ka mid ahaayeen wax ka dhignaa sharci caalami ah oo dadka iyaga iyo hantidooda dhibaatada loo geysto xaq u siinayey magdhaw waafaqsan hab khasaaraha loo qiimeeyo oo la wada aqoonsan yahay, lagana yaabo inuu tafaasiisha oo keliya ku kala duwanaado. Habkaas loo magdhabo waxa Soomaalidu u

taqaano gefka ama qaantu wuxuu ku salaysan yahay shareecada Islaamka taasoo qofka lab naftiisu ugu qiimaysan tahay boqol geel ah, tan qofka dheddigna konton geel ah. Waxaa taas lagu meel mariyaa heshiisyo dhaqameed ama xeerar, kuwaas oo marka hore isku xira koox galana wada qaata). Waxaa xeerka guud ee ummadeed markaas loo arki karaa mid laga soo xigtey heshiisyadaas ama xeerarkaas gaar ahaaneed ee hoose. Maanta, sidii taariikhihii horeba jiri jirtey, kooxahaas isku magta ah ayaa ah xubnaha saldhigga u ah dhismaha siyaasadeed ee bulshada Soomaaliyeed. Xubnahaasi (koxahaas mag-wadaagta ahi) waa kuwo, marka laga hadlayo beer-iyo-xoolaleyda labada webi dhex deggan, ka ballaaran kana deggan kuwa xoola-dhaqatada dhan walba kaga xeeran ee is-bahaysigooda siyaasadeed ee abtirsiinta ku dhisani uu yahay mid is bed-beddel badan oo aan lahayn meel loogu soo hagaago.

Markaas, inkastoo dadka Soomaaliyeed intii aan isticmaarku kala qaybin aanay lahayn dawlad midaysan, hababkaas wax loo mago ama garta loo naqo ee ay wadaagaan ayaa siinayey qaab siyaasadeed-sharciyeed "qaran" oo si fudud isugu xiran, kaasoo sii xoojiyey dareenkooda midnimo ee ku salaysan afka iyo dhaqanka (Taasi, dabcan, meesha kama ay saarin kala-duwanaansho dhaqameed oo muuqda kuna salaysan degaannada oo ku dhex jira nidaamkaas guud ee ballaaran).

Inkastoo astaamahaasoo dhammi yihiin kuwo ka mid ah dhaqan-siyaasadeedka Soomaaliyeed oo hore si fiican wax looga qoray, qaabka dhabta ah ee dagaalgelinta iyo sida loola dhaqmo dadka la qabto iyo dhaawacu ma ahayn kuwo dadka wax baaraa si habaysan hore ugu gudagaleen. Daraasaddan ay iska kaashadeen koox yar oo Soomaali ah oo ku takhasusay taariikhda afka laysaga tebiyo ayaa, sidaa darteed, fashay waddo cusub oo baaris tifaftiran loogu galo xeerarkii dagaalyahannada Soomaaliyeed laga fili jirey inay dhawraan marka ay dagaalka ku jiraan. Waxay daraasaddani ifinaysaa dadka, sida la fili jirey, dilka ka caagganaa ama biri-ma-geydada ahaa sida dumarka, carruurta, wadaaddada, martida iyo madaxda beelaha. Dadkaasi waa qaar ay saamayso kala-saaridda Soomalidu bulshada u kala saarto in jilicsan iyo in xoog leh. Dadka jilicsan, ee ama itaalka daran ama dhaqaale ahaan u liita, waxa loo haystaa inay Ilaahay si gaar ah magan ugu yihiin. Sidaa darteedna, waxaa laga yaabaa in waxyeelladooda cuqubo iyo ciqaab Alle laga dhaxlo. Arrimo danaysi ayaa iyaga ruuxoodu caqligal ka dhigaya in la dhawro dadka berrito ergeynta looga baahan doono (sida dumarka) iyo hoggaamiyeyaasha laga yaabo in aakhirka wada-hadallo nabadeed loo soo hor fariisto. Arrimahaas danta iyo baahida ku dhisan ee qofka xad-gudubka ka celinaya waxa sii xoojiya Soomaalida oo ay la weyn yihiin waxa sharafta iyo magaca la yiraahdaa, iskuna daya inay ka fogaadaan wixii u soo jiidaya dheg-xumo iyo quursi. Arrinta sumcaddu waxay ahayd mid culus. Dhaqan ahaan, qayb ka mid ah waxyaalaha Soomaali oo dhammi isku raacsan tahay in magdhaw laga bixiyo waxaa ka mid ahaa af-lagaaddada xaalka layska siiyo, taasoo qofka loo geystaa u daba geli jirey sida uu u daba galo magdhaw ugu waajibey qudh go'day ama qoon la taaban karo. Xasaasiyadda laga qabo cayda aan la galabsan ee halkan ka muuqataa waxay ahayd mid loo garaabi karo marka la eego sida dhaqankan hadalka ku dhisan loogu dhex adeegsan jirey gabayga (ama maansada) si loogu faafiyo cambaaraynta, dacaayadda iyo sumcad-dilka.

Si ay dib ugu soo saaraan jawigii aanada iyo dagaalka ee ka jirey dhaqanka Soomaaliyeed qoriga Klashkofka ka hor, waxay ka-qayb-qaatayaasha qoraalkani adeegsadeen xasuusta odayaal-dhaqameed xog-ogaal ah iyo maragga ku dhex kaydsan suugaanta afka laysaga tebiyo, gaar ahaan maansada. Inkastoo waxyaalahaas la tix-raacay mar walba sawir la yara qurxiyey naga siinayaan dhaqankii hore, taasi waa mid ka-qayb-qaatayaashu maskaxda ku hayaan ayna isku dayeen inay ku xisaabtamaan marka ay mawduucan soo bandhigayaan.

Maadaama aanay waxba ka adeegsan qoraallada cilmi bulshadeedka ee jira, shaqadoodani waa mid aan gebi ahaanba cidi uga horrayn kana dhigan wax-soo-kordhin cusub oo qiimo leh. Waxaa weliba hawshan mid loo sii qushuuco ka dhigaya iyadoo lagu qabtay duruufahan nabadgelyo-la'aanta ee dalku ku jiro, kuwaas oo aan aad ugu haboonayn daraasad aa sn caadifadi ku jirin. Waxaa intaas dheer iyadoo qorayaashu aanay ku doodayn inay wada sugeen mawduuca ay ka hadlayaan balse ay ka codsanayaan cid kastoo aqoon dheeraad ah arrimahan u leh inay u soo gudbiyaan Ururka Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah ee daraasaddan maalgeliyey. Ujeeddadu waxay tahay inidaas lagu dhiirrigeliyo wada hadal, dadkana lagu boorriyo inay tagtadooda si fiican u fahmaan si ay waxa taagan uga tashan karaan.

Waxay aniga ila tahay in baaristan cusub ee loo baahnaa, inkastoo meelaha qaarkood ay kala dhiman tahay, ay inoo muujinayso sida bulshadii hore ee Soomaaliyeed u lahayd "Axdi Jineefa" u gaar ah oo lahaa dhaqan iyo xeer dagaal oo laysla oggol yahay kuwaasoo, sida kuwii u dhigmey ee Yurub, loo arkayey in dhawristoodu habboon tahay, dhaqangelintoodase ay ka fududayd in loo adeegsado qiimaynta sumcadda qof leeyahay ama kooxi leedahay. Markaan ka hadlayno xaaladda Soomaalida, oo ah ta halkan nagu khusaysa, waxay xeerarkaasi ahaayeen qaar ka soo jeeda dhaqan reereed oo sharafta qofeed iyo tan wadareedba ka ahaayeen hanti itjtimaaci ah (iyo mid siyaasadeedba). Teknoloojyada dagaalkuna waxay ahayd mid ku habboon dhaqankaas tolka iyo qaraabada ku dhisan. Guud ahaan gardarrada (iyo waxyeelladu) waxay ahaan jireen qaar kooban oo cid cayiman loo geysto, sidaas darteedna markiiba la xakamayn karo, xataa marka loo eego bulshadan aan awoodda siyaasadeed ee dhexe lahayn ee xilfiyadeedu sida joogtada ah isu bedbeddelaan. Teknoloojyada geerida ee casrigan ee wadata hubka darandoorriga u dhaca ee awoodda badan iyo dilka xad-dhaafka ah ee micna-beelay ayaa, sida muuqata, si aad ah uga hor imanaya xeerarkii iyo dhaqankii soo-yaalka ahaa, isla markaana adkaynaya habkii dib-u-heshiisiinta.

I. M. Lewis
Emeritus Professor of Anthropology
London School of Economics
1 January 1997

# Gogoldhig

Dagaalladii sokeeye ee tobaneeyo sanaba ka dhacayey dalka Soomaaliya dad badan ayay ku rideen dhabanna-hays iyo amakaag[1]. Dad badan oo ay Soomaalida laftoodu ka mid yihiin, waxaabay u arkeen in aanay Soomaalidu lahayn wax xeer ah oo mideeya iyo milgo[2] ma-dhaafaan ah ama xuduudo cayiman oo madeeya[3], midnaba. Aqalladii ayaa la gubey, waa la is ogaal-dhacay, biri-ma-geydadii ayaa la dhawri waayey: ubad, haween, oday, habar, sheekh caalim ah, midnaba looma kala aabbo-yeelin. Falalka caynkaas ahi waxay noqdeen kuwo ka fajiciyey adduunweynaha, dadka Soomaaliyeed iyo dhaqankoodana sawir xun ka bixiyey.

Taasi waxay keentay in dad badani is weydiiyaan haddii ay jireen xeerar Soomaalidu ka lahayd xadgudubyada dagaalka, oo kicisay in arrintaasi meelo badan xiise looga yeesho, ayna ka dhasheen hindisooyin ah in baadi-doon loo galo xeerarkii colaadaha ee Soomaalidu hadda ka hor guud ahaan ku dhaqmi jirtey, ilaa haddana dadka qaar ku sii dhaqmaan. Si taasi loo helo, waxaa Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas laantiisa qaabilsan Soomaaliya iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed hawlgeliyeen aqoonyahanno ku xeel dheer taariikhda iyo suugaanta Soomaaliyeed, una xil saareen inay maaddooyinka qoraalkan soo ururiyaan, iyadoo la tix-gelinayo degaannada kala duwan ee guud ahaan Soomaalidu u qaybsan tahay. Waxay daraasaddani, markaas, ku salaysan tahay wareysiyadii ay baarayaashaasi la yeesheen dad fara badan oo aqoon u leh xeer dhaqameedkii hore ee dadka Soomaaliyeed.

Isla markaasna waxaannu qooraalkii soo baxay u qaybinnay dad aqoonyahanno ah oo kala jooga dalka gudihiisa iyo dibaddiisaba, kuwaas oo lahaa Soomaali iyo qaar aan Soomaali ahayn, si iyaguna uga soo tala-bixiyaan daraasadda. Qoraalkan ugu dambeeya in badan baa talooyinkoodii lagaga soo daray.

Ujeeddada qoraalkani waxay tahay in su'aalaha kor ku xusan laga jawaabo iyadoo la soo bandhigayo xeerarkii Soomaalidu ku dhaqmi jirtey, gaar ahaan kuwooda la xiriira xaaladaha dagaallada, iyo in dadweynaha Soomaaliyeed lagu baraarujiyo faa'iidada ku-dhaqanka xeerarkaasi iyo khasaaraha ka dhasha baal-mariddooda. Waxaa kale oo daraasaddani muujinaysaa in xeerarkaas badankoodu waafaqsanaayeen kuwa uu dhigayo axdiga Jineefa, laguna dhaqmi jirey muddo badan ka hor intii aan axdigaasba la soo saarin.

Bulshada Soomaaliyeed, gaar ahaan dadka reer-guuraaga ah, xiriirkoodu dhan walba waxa uu ku salaysnaa habka tol-tolka ee abtirsiga ku dhisan. Intooda ay hadba tol-nimadaasi isku tosho waxaa ka dhexeeyey garab iyo gaashaan, hiil iyo hoo. Col soo duula laga wada hor tegyaa, gar-darro kale laga midowyaa iyo dhibaato dhaqaale layska kaashayaaba, "**tolku, tolanuu ahaa**". Inta badanse, fidmo, xumaanto, gar-darro iyo daandaansi looma midoobi jirin. In godobta layska qabto, samahana laysla qabto ayaa tol loo ahaa; waana tii uu Cabdalle Caaggane ka yiri:

**Waakasho[4] wax-siin baan ka aamminey**
**Dagaalna nabad baan ka aamminey...**

---

1. Amakaag (amankaag) = yaab xoog leh; fajac
2. Milgo = wax la qadderiyo; wax la xurmeeyo; hab-dhaqan la raaco
3. Madeeya = xadeeya; ereygu wuxuu ka yimid "made" oo ah xadka laba beerood kala qaybiya
4. Waakasho = wax bixin la'aan; deeq la'aan; reebasho

Dadkuna wuxuu ahaa tol iyo xidid(gacal). Waxaa la ahaa dad isku xiran oo dhaqan iyo dhiigba wadaaga. Waa lays geyaansan jirey oo abti iyo seeddi baa laysu ahaa. Dadka xaq-dhawr iyo xishood baa ka dhexeeyey. Tacaddiga iyo dar-jiidhka dagaalka intaba, waxaa ku kacaayey nimaan xishoonayn, waana tii abwaan Soomaaliyeed beri hore ka yiri:

**Illeyn nimaan xishoonayn dagaal, xeeli[5] kama hayso**

Wax intaa ka baxsanna hadalkeedaba daa, illeyn dadku kol hadday tol iyo gacal wada yihiin, waa wada sokeeye, oo waa tii la yiri:

**Dagaal ha ku degdegin, ku sokeeyena haba ku darin**

Xeerarka colaadda , iyo kuwa kale ee lagu daryeelayo danta iyo nolosha bulshada, waxaa sebenno hore oo aan la xusuusan karin dejiyey dad Soomaaliyeed oo guurti ah, intii ka dambeyseyna waxay noqdeen kuwo la iska tix-raaco oo facba fac ka dhaxlo. Xeerarkaas mar keliya lama wada dejin, ee si is-daba-joog ah bay u soo baxayeen iyadoo ay xukumeen xaaladaha iyo duruufaha marba soo cusboonaadaa.

Haddaba, iyadoo aynu ogsoonnahay in aan dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan reer-guuraagu, lahaan jirin maamul dawladeed oo kulmiya iyo awood dhexe oo u xilsaaran ilaalinta xeerarkaas iyo fulinta ciqaabaha lagu mutaysto ku-xadgudubkooda, waxaa is weydiin mudan: maxaa dadka ku kallifi jirey inay xeerarkaas u hoggaansamaan? Waxay nala tahay inay arrintaas ugu wacnaayeen dhawr arrimood oo ay ka mid ahaayeen kuwa soo socdaa:

**b) <u>Cadaadis Bulsho</u>**

Xeerarkaasi waxay ahaayeen kuwo bulshadu wada aqoonsan tahay, una aragto inay lagama-maarmaan u yihiin sugidda danta guud iyo dhaqanka dadnimadu ku jirto. Taasi waxay keeni jirtey in qofkii xeerka ka tallaabsadaa uu tuke baal cad dadka ka dhex noqdo oo la cambaareeyo lana fongoro[6]; ciqaabtaasina ma ahayn mid la dhayalsan karo ama si fudud loogu bareeri karo.

**t) <u>Xeer-Dhigasho</u>:**

Soomaalidu waxay aamminsanayd fikrad la yiraahdo "nabsi" oo macnaheedu yahay inaan ruuxna xaalad keliya ku waarayn. Haddii uu maanta hodan yahay waxaa suurowda inuu berrito cayroobo, kii cayrta ahaana xoolaysto. Sidoo kale qolada maanta goob dagaal libi ka raacdo, waxaa dhici karta inay goobta ku xigta ku jabto. Haddii ay markaas maalintii hore cidday arkaanba waranka gesheen, hantiday arkaanna ama dhaceen ama burburiyeen ama dab sureen, waxay fishaanba waa in iyagana maalinta laga gacan sarreeyo sidaas iyo si ka daran loo galo oo maatadooda la laayo, guryahooda la gubo, hantidoodana la boojiyo[7]. Mar haddii aan cidina jeclayn in taasi ku dhacdo, iyaguna ma geysan jirin. Sidaas darteed, ilaalinta xeerka colaadda cid waliba iyada ayaa ku danaysan jirtey inta aanay cid kaleba ugu danayn.

**j) <u>Ka-Carar Cuqubo</u>:**

Xataa haddii aan nabsi laga cabsanayn, waxaa laga biqi jirey wax la yiraahdo "cuqubo", taasoo ah masiibo xagga Rabbi kaga dhacda qofka, ama qolada, dhibaato u geysata

5. Xeel = dan; muraad; xaalayn
6. Fongor = takoor; dad-ka-dhex-saarid
7. Boojiyo = dhaco; qaado

dad jilicsan ama karaamo leh, xoolaha ma-yeeraanka ah iyo dhirta la manfacaadsadaba. Soomaalidu waxay ku maahmaahdaa:

**Way sokeeye iyo wii sagaaro midna ma baaqdo.**

Waxa la rumaysnaa in qofka ruux kale gardarro ama arrin fudud ku dila ay maalintaasi ugu dambayso xasillooni iyo deggenaansho maskaxeed, ifkana uusan wax wanaag ah kula kulmayn; farta ayaana laysugu fiiqi jirey iyadoo la leeyahay, "waa qof dhiig iyo habaarro qaba ee ka carara!" Xataa dhulka meesha fal cuqubo ah lagu galay waxay ahayd meel laysu tilmaamo oo aan reer lagu furin sida laga dhadhansan karo geeraarkan uu Cabdi-Gahayr u tiriyey tuulo beri lagu xidhay:

**Ardo kaama bulaantoo**
**Aroos kaama ciyaaroo**
**Isu-reemaha geel iyo**
**Adhi kaama dareero!**
**Meeshu aaya la'aa !**
**Ma wadaaddo Ashraafiyo**
**Agoon baa lagu laayey?!**

j) **Caaqiibo talin:**
Dadka reer-guuraaga ahi waxay ahaayeen dad halgan joogto ah ugu jira siday ugu noolaan lahaayeen dabiicadda arxanka daran ee ku xeeran. Sidaa darteed qolana awood uma hayn dagaal daba dheeraada oo ugu darsama dagaalka ay kula jiraan nolosha. Isla markaas, waxay ahaayeen dad aan kala maarmin oo siyaalo badan isugu xiran. Sidaa awgeed, waxaa lagu dadaali jirey in dagaalku noqdo mid laysaga iman karo oo laga heshiin karo. Taasina waxay ku imanaysey in la xarrago-diriro oo biri-ma-geydada la dhawro.

**x) Diinta Islaamka:**
Diinta Islaamka ayaa iyaduna door weyn ka qaadatay adkaynta xeerarkii Soomaaliyeed ee dagaalka, iyadoo falalka dhaqanka Soomaaliyeed ka reebbanaa iyo dad iyo duunyaba inta biri-ma-geydo ka ahayd ay xagga diintana biri-ma-geydo ka ahayd. Soomaalidu, iyadoo arrintaas tilmaamaysa, waxay tiraahdaa:

**Kas rag iyo Kitaab Alle way is tagaan.**

Diintu waxay cuqubadii Soomaalidu ka biqi jirtey ku sii xoojisey ballan-qaad cadaab aakhiro oo sugaya qofkii, xilli dagaal iyo xilli kaleba, ku kaca fal waxshinimo ah oo ka tallawsan xuduudda Alle.

**kh) Awoodda Qabiilka:**
Marka intaasoo dhan laga yimaaddo, waxaa jirtey awood ciqaabeed oo bulshadu ku fulin karto qabiilka gardarrooda ama si xun ugu tunta xeerarka biri-ma-geydada taasoo ku iman jirtey in dagaalka laysugu raaco ama qolada ay is hayaan hub iyo taakulayn lagu siiyo. Qabiilka ruuxiisuna wuxuu awood u lahaa inuu qabto xubnihiisa xeerka jebiya, oo si ku meel gaar ah u xiro, ganaaxo (maraado) ama dilba u soo xiro (qisaas).

Suugaanta Soomaaliyeed ee faraha badan ee la xiriirta dhiirri-gelinta nabadda iyo ka-digidda khasaaraha colaadda waxaa ka mid ahaa maahmaahaha, oraahyada iyo gabayada soo socda:

**Ha dagaalin: Minaad[8] raydo[9] reerkaaga waaye; minii lagaa raayo, ruuxaaga waaye**

**Dagaal wiil baa ku dhinta ee wiil kuma dhasho**

**Ciil beel ciil uun bay dhashaa**

**Rag gogoshii waa godob la'aan**

**Sow godobi surinkaad martaba, sabab qarsoon maaha**
**Sow nabadi sahaydaada ood, sidatid uun maaha**

Gaba-Xaddi

**Nebedaa naas la maalo leh**

**Haddii aan la kala roonaan roob ma da'o**

**Raggu saddex waa iskaga mid:**
1. Magaca 2. Magta 3. Maganka (lab ahaanta)
**Saddex bayse ku kala tagaan**:
1. Wixii tegay ka-hariddii
2. Waxa jooga ka-hadalkii
3. Waxa soo socda ka-haloosigii .

**Miyir waxaad ku weydaan is-waal, kuma mihiibtaane**
**Muslin kuma cabiidsamo walloon, madaxa kaa goyne**
**Nin dharkayn[10] mudmudey hoosna maray, murux inshaalleeye**
**Muggii weel ma dhaafee Allow, mooska yaan jebinnin**

Saahid Qamaan

Sidaa darteed, inkastoo dagaallo, mararka qaarkood ba'ani, ka dhex dhici jireen beelaha Soomaaliyeed, inta badan ku-talax-tag ma dhici jirin, iyadoo ay jireen xeerar adag oo baajinaya in colaaduhu ay faraha ka baxaan.

Qoraalkan waxaa ku jira sheekooyin, maanso, maahmaaho iyo murtiyo kale oo muujinaya sababaha dhalin jirey dagaallada, siyaabaha loo soo afjari jirey colaadaha iyo sida loo dhawri jirey nolosha iyo, guud ahaan, xuquuqda dadka jilicsan iyo kuwa bulshada tixgelinta ka mudan. Kooxahaas oo guud ahaan la huwin jirey magaca "biri-ma-geydo", waxaa ka mid ahaa dumarka, carruurta, waayeelka, bukaanka, maganta, martida, dhaawaca la qabto, culimada, safarka iwm. Sidaas oo kale, iyadoo loogu danaynayo nolosha iyo jiritaanka bulshada, waxaa jirey xoolo, dhir, hanti maaddi ah iyo meelo iyaguna ka mid ah biri-ma-geydada oo ay ahayd inaan lagu xad-gudbin xilliyada colaadaha. Inkastoo ay mar mar dhici jirtey in xeerarkaasi qaar ka mid ah la jebiyo, waxay xaaladahaasi ahaan jireen kuwo

8. Minaad (minii) = haddaad (haddii)
9. Raydo (rayso) = adkaato; libaysato; gacanta sare yeelato
10. Dharkayn = geed leh dheecaan kulul oo maqaarka guba

kooban oo kala durugsan oo aan lahayn saamayn guud sida masiibada maanta ka taagan Soomaaliya taasoo laga yaabo in ay ka dhalatay iyadoo laga tegey dhaqankii iyo xeerarkii soo-jireenka ahaa. Daraasaddanise, sida laga arki karo, waa mid taariikheed oo ku saabsan sidii wax ahaan jireen. Sidaa darteedna, kuma jiraan wax dhacdooyin ah oo la xiriira dagaallada sokeeye ee muddooyinkan dambe ka jirey geyiga Soomaaliyeed.

Waxaa xusid mudan in dhacdooyinka qoraalkani ku salaysan yahay aan loo tix-raacin taariikh qoran, balse ay u badan yihiin sheekooyin iyo dhacdooyin taariikheed oo afka laysaga soo gudbiyey, oo laga yaabo intii la isu soo tebinayey in isbeddello ku dhaceen. Sidaas darteed, waxaan uga afeefanaynaa ciddii wax saluug ah ama dhaliilo ah ku aragta in aysan jirin wax ogaan iyo ujeeddo loo beddeley, wixii laga ilduufayna[11] waa uun wax ogaan la'aan nagu seegay. Soomaaliduna waa ta tiraahda: "Ilaahow eex ha nagaga tegin, aqoondarrana ha nagu cadaabin". Waxaan kaloo ka cudur-daaranaynaa in ay noo suuroobi weydey in tusaalayaasha qoraalkan laga soo wada qaato degmooyinka Soomaalida oo dhan iyadoo ay ugu wacnayd xaaladdii ammaan-darrada ee degaanka Soomaaliyeed ka taagnayd markii baaritaanka la wadey, awoodda dhaqaale oo xaddidnayd iyo wakhtiga oo koobnaa. Waxaanse rumaysannahay in inta aanu soo qaadannay ay sawir fiican ka bixin karto dhaqankii iyo xeerarkii dadka Soomaaliyeed, guud ahaan. Waxaan ognahay in ay jiraan sheekooyin iyo suugaan badan oo laga yaabo in ay ka habboon yihiin kuwa aan adeegsanney. Sidaa darteed, waxaan ku talo jirnaa in, haddii Eebbe idmo, aan wixii nagu soo kordha ku darno daabacaadda labaad ee qoraalka, haddii uu noqdo mid wax-tar ah oo la xiiseeyo. Waxaan soo dhoweynaynaa cid allaale ciddii nagu soo biirisa wax taariikh ah ama suugaan ah ama ra'yi ah oo la xiriira mawduuca daraasaddan.

11. Ilduuf = wax ishu kamma' uga booddey ee aan ujeeddo loo dhaafin

# Maxaa kicin jirey colaadaha ?

Soomaalidu waxay ahaayeen, welina yihiin, dad u badan xoolo-dhaqato reer-guuraa ah; afarta maal-adduunyo: adhiga (ido iyo riyo), ishinka (lo' iyo geel), iyo gammaanka (fardo, baqlo iyo dameero) intaba, hodan ku ah. Waxaa isla markaas jirey, haddana jira, qayb muhiim ah oo ka tirsan bulshada Soomaaliyeed oo dhaqashada xoolaha ay u weheliso beero ay tabcadaan iyo qaar kale oo noloshoodu ku xiran tahay dalagga beeraha oo keliya. Guud ahaan, iska-hor-imaadyada Soomaalida ka dhex dhacaa waxay ahaan jireen kuwo ka dhasha mid ama dhawr ka mid ah arrimaha soo socda:

1. Geela iyo fardaha
2. Daaqa iyo biyaha
3. Dumarka
4. Qabka iyo gar-diidka
5. Beeraha
6. Dariiqooyinka
7. Dhaqanka

## *1. Geela iyo Fardaha*

Hantida keliya ee xeer Soomaaligu oggolaa in la kala qaadaa waxay ahayd geela iyo fardaha oo ay ugu wacnayd qiimaha ay ku lahaayeen bulshada dhexdeeda. Tusaale ahaan, geelu wuxuu ahaa tiirka nolosha beesha reer guuraaga ah iyadoo la manafacaadsan jirey cadkiisa, caanihiisa iyo saantiisaba, isla markaana gaadiid ahaan loo adeegsan jirey. Kaalinta mudan ee geelu kaga jirey nolosha xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed waxaa ugu sii wacnayd adkaysiga dheeraadka ah ee uu u leeyahay cimilada qallafsan ee degaanka Soomaalida. Isagoo tilmaamaya adkaysiga dheeraadka ah ee geela, gabayaagii la oran jirey Cumar Istireeliya waa kii lahaa:

**Waa dhagax nafluu hayjadaa[12], dhigay Ilaahaye**
**Waa dhabarka seedaha ku yaal, sidigta[13] Dhaameele**
**Haddii aanu dhadhaab[14] adag ka bixin, laguma dhaateene**

Samatar Baxnaan, oo afadiisa ku baraarujinaya waxtarka iyo lagama- maarmaannimada geela, ayaa isna yiri:

**Aqallaale maantii asqiyo[15], oon la socon waayey**
**Ummulaha bakhtiyey maalintii, loo af-dhiqi waayey**
**Aagaan karuuraa sudhnayd, awrta kuu rarane**
**In markaad dhantaba dhay kalaad, ku il-tirayseene[16]**

12. Hayjad = meel cidla' ama lama-degaan ah; qarfe; waaq-la'
13. Sidig = laba halaad iyo ilmo wada nuuga; hal ilmo aysan dhalin nuugo
14. Dhadhaab = dhagax weyn oo malaasan
15. Asqo = harraad xad-dhaaf ah oo gaajo iyo jahawareer weheliyaan; dhanqalan; dayow
16. Il-tir = buuxin

**Adhi iyo lo' baa lagu baxshaa, aano[17] kuu timide**
**Aar-laaga geela ah naftaa, lagu ilaashaaye**
**Kolay aabbahaa tahay nin kale, looma aammino e**

Waxtarkiisa dhaqaale ee tooska ah waxa geela u sii dheeraa isagoo ahaa xoolaha keliya ee lagu bixiyo waxyaabaha ay ka mid yihiin magta iyo yaradka. Dhab ahaantii, geelu wuxuu ahaa hal-beegga hanti oo dhan lagu cabbiro. Sidaas darteedna, waxay Soomaalidu tiraahdaa:

**Geel waa geel; wixii gooyaana waa geel**

Guud ahaan, han-weynida ninka geel-jiraha ahi hashiisa u hayn jirey waxaa laga milicsan karaa heesta geela ee soo socota:

**Geerida haween**
**Guud[18] la feedhiyo**
**Guursi laga qaad**

**Geeridaadana**
**Gaawe madhan iyo**
**Gaajo laga qaad**

**Geeridaydana**
**Guryo ba'ay iyo**
**Goblan laga qaad**

Taasi waxay keentay in geelu noqdo astaanta hodannimada iyo qiimaha ijtimaaciga ah, iyadoo ninka aan geel lahayni ahaa nin aan culays iyo qiimo weyn bulshada dhexdeeda ku lahayn oo aan la tirsan, lana tixgelin. Arrintaasi waxay gaarsiisnayd heer uu gabaayaaga la oran jirey Cabdi-Gahayr ku doodo in ninka aan geel lahayni uusan xataa aakhiro waxba ku lahayn. Isagoo aragtidaas gabay ku soo bandhigaya, wuxuu yiri:

**Idin-bacasa[19] awrkay dhashiyo, aarankay[20] wadatey**
**Asaxaabihii horeba way, ku intifaaceene**
**Aakhiro nimaan geel lahayn, lama ammaanayne**

Sidaas darteed, nin waliba wuxuu ku dadaali jirey inuu geel ku helo si allaale sidii suuragal u noqon karta, taas oo laga arki karo heesta tiraahda:

**Xalaal iyo xoog**
**Hadduu xero galo**
**Midna kuma xuma**

---

17. Aano = dakano; dhibaato cid la gaarsiiyey; qaan
18. Guud = timo
19. Idin-bacasa = halkan waxaa loola jeedaa hashii Nebi Saalax mucjisada loo siiyey
20. Aaran = geela yaryar ee da'diisu badanaa u dhexayso 2-jir ilaa 4-jir

Dabcan, arrintaas waxaa ka dhalan jirey dagaal dhimasho iyo dhaawacba keena, mararka qaarna colaad dheeraata sabab u noqda; waayo, nin aan geela dhacsashadiisa diyaar u ahayni, markiisa horeba ma haweysan jirin dhaqashadiisa. Gabayaaga la oran jirey Cabdi Galayax oo tilmaamaya cabsida iyo dhiillada la xiriirta dhaqashada geela baa wuxuu yiri:

**Bilaash iyo ciyaar looma helo, Bogiyo Heemaale**
**Nimaan dhabarka baaruud ku xiran, Baar ma foofsado e**
**Rag bireysan buun iyo rasaas, boohin iyo qaylo**
**Iyo laba bahood maalin ay, boqol ku ruux weydo**
**Belo iyo col baa lagu tabcaa, Baarax weligeede**

Soomaaliduna waxay oraah u leedahay:

**Geel doono, geeso dhiig leh bay dhashaa**

Inkastoo ay sidaas ahayd, haddana ninka ku dhinta isagoo geel dhacaya ama dhacsanayaa wuxuu u ahaa xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed nin arrin sharaf leh ku dhintay, geeridiisuna xalaal tahay, sida laga dhadhansan karo murtida tiraahda:

**Rag wuxuu ku dhintaa**
**Waa dhaqaaqasho geel**

Sidaas baa intii geel jireyba ay u jireen dagaallada iyo colaadaha la xiriiraa, sida ay tilmaamayso heesta soo socotaa:

**Sidii loo helay**
**Ragna loo hirey**[21]
**Loogu hadalyoo**
**Looguma heshiin**

Soomaalidu waxay u haysatey geela in aan la kala xigin, dhaciisuna uu xalaal yahay; waxaana hadalladooda ka mid ahaa:

**Aydin**[22] **geel hadba waa ninkii u xiga,** ....... ama
**Aydin geel hadba waa ninkii ay gacantiisa ku dambayso**

Isagoo tilmaamaya fikradda ah in geelu rag oo dhan ka dhexeeyo, Sayid Maxamed Cabdille Xasan, wuxuu gabay ku yiri:

**Dhaqaaleeya dhaha geelu way, naga dhexeeyaaye**

Fikradda wada-lahaanshaha Geelu waxay sii xoog badnayd marka laga hadlayo qabiil keliya dhexdiis, sida ay tilmaamayso sheekadan gaabani:

21. La hirey = la celiyey; la jebiyey; la muquunshey
22. Aydin = midab casuus (guduud) leh oo geela u gaar ah.

*Waxaa jirey nin geel badan lahaa, laakiinse aan cid ka soori jirin. Geelaas isaga ah waxaa ku jirtey hal cad. Maalin maalmaha ka mid ah ayaa col soo duuley oo geelii hasha cadi ku jirtey qaaday. Tolka badankiisii waxay is tuseen in aan loo gurman geelii hasha cadi ku jirtey ee la dhacay. Nin baase arrintaa ka hor yimid oo yiri: "Nimanka geela qaaday odhan maayaan geelii **hebel** baannu qaadnaye, waxay odhanayaan geelii **reer hebel** baannu soo qaadnay. Haddii ay taasi dhacdana, berritana kuweenna ayaa la soo hungurayn doonaa, oo waxaa la odhan doonaa reer hebel geelooda ma dhacsadaan". Sidii baana geelii hasha cadi ku jirtey loogu gurmadey laguna soo dhiciyey.*

Fardaha ayaa, sidaas oo kale, qiimayn ballaaran ku dhex lahaa beesha reer guuraaga Soomaaliyeed, iyadoo loo adeegsan jirey ujeeddooyinka safarka dheer, is-gaarsiinta wararka, sahanka, iyo dabbaaldegyada. Wuxuu kaloo farasku ahaa wehelkа uusan ninka dagaalyahanka ahi marna uga maarmin xaaladaha gulufka iyo colaadaha, sida ka muuqata tuducyadan ka midka ah geeraar uu Raage Ugaas ku ammaanayey faraskiisii Walhad:

**Meel waylaaqtan[23] col joogoo**
**Warmaha laysku ridaayana**
**Wadnahaan ku kabaaye**
**Wiil uu Eebbe ku siiyiyo**
**Ma walaalkay rumaa?!**

**Waran waaxyaha gooyiyo**
**Wayab[24] qaarka madow iyo**
**Riddo soo widh-widhlaysiyo**
**Wajaafkeeda[25] rasaastuu**
**I weydaarinayaaye**
**Ma wadaad la yaqaannoo**
**Wanaaggii arbacuunka[26]**
**Weligiisba yiqiinoo**
**Wan intood u qashay**
**Wadduxaaga Quraankiyo**
**Walleyl kuu akhriyaa?!**

Hase yeeshee, ahamiyadda ugu weyn ee farduhu waxay ahayd mid toos ula xiriirta ahamiyadda geela, iyadoo farasku lagama-maarmaan u ahaa geela dhaqiddiisa, dhaciisa iyo dhacsigiisaba, sida laga milicsan karo labadan beyd oo ka mid ah gabay faan ah oo uu nin Ducaale Fagaase la oran jirey u tiriyey Daraawiishta:

**Sayidkuba ka fiig geelayaga, inuu faduushaaye**
**Faras xoog leh baa lagu dhiqiyo, geesi fool adage[27]**

Heesaha faraha badan ee Soomaalidu fardaha u tirin jirtey ee lagu tilmaami jirey kaalinta farasku ka geli jirey gulufka iyo dagaallada geela la xiriira waxaa ka mid ahaa:

---

23. Waylaaqtan = qaylo iyo buuq; sawaxan
24. Wayab = leeb ama fallaar sun la mariyey
25. Wajaaf = nabar, dhakhar ay qofka walax xawli ku socotaa gaarsiisey
26. Arbacuun = 40 faataxo
27. Fool adag = dhiirran; sooma-jeeste ah; aan gabban

**Haddii gelin hore**
**Geela lala tago**
**Oo warku is galo**
**Gabbal-gaabkii**
**Gar Nugaaleed**
**Gabbacyeeyow[28]!**

Isaga oo farasku ahaa astaan xarrago iyo mid sharafeedba, waxaa mararka qaarkood la raacin jirey magta iyo yaradka, wuxuuna ahaa waxa ugu qaalisan ee hadiyad la isu siiyo. Sayid Maxamed Cabdille Xasan oo muujinaya sida ay ugu adkayd inuu faraskiisii Xiin Finiin ku daro yaradkii gabadha la oran jirey Faadumo Islaan, waa kii lahaa:

**...Xamar weeye oo midab fardood, kala xariir roone**
**Xubno toosanow neefku waa, xaalad gooniyahe**
**Waxaan xarafka diineed ahayn, igaga xeel dheere...**
**...Mar hadduu suldaan igu xil lihi, igaga xaydaantay**
**Xadhiggiisa qabo aadmi kale, kuma xurmeeyeene**

Waxtarka iyo qiimaha ballaaran ee farduhu lahaayeen waxay Soomaalidu ku soo koobtay oraahdan:

**Haddaad xoolo dooni, xamaro ag joog;**
**Haddaad xilo dooni, xamaro ag joog;**
**Haddaad xarrago doonina, xamaro ag joog.**

Haddaba, maadaama fardaha sidaas loogu han-weynaa, sida geela loo kala qaado ayaa iyagana loo kala dhici jirey (gawaan-raacis), dagaallana uga kici jireen.

## *2. Biyaha iyo Baadka (Daaqa)*

Geyiga Soomaalidu degto, waxaa intiisa badan lagu tilmaamaa oommane lama-degaan xiga oo biyaha iyo dhirtuba ku yar yihiin. Dadka iyo xooluhuba waxay xilliyada jiilaal ee dhaadheer ku soo ururi jireen goobaha ceelasha iyo ilaha kale ee biyaha (intii aan la samayn berkadaha iyo riigagga). Taasi waxay keeni jirtey khilaafyo iyo isku-dhac ka dhasha qaybsiga biyaha iyo sida loo kala hor cabbayo. Iyadoo ay yaraayeen meelaha ay ka dhow yihiin biyaha dhulka hoos mara ee sida fudud lagu gaadhi karaa, waxaa had iyo jeer taagnaan jirey loollan beelaha kala duwani ugu jiraan hanashada ilaha biyaha, kaasoo mararka qaarkood qaab iska-hor-imaad hubaysan yeelan jirey.

Dadka beeraleyda ah waxaa iyagana ka dhex dhici jirtey in la isku qabto kaltanka waraabka beeraha, oo uu khilaafkaasina ka kaco qof jebiyey xeerkii u degsanaa qaybsiga biyaha beeruhu ka cabbaan, iyadoo ay suurowdo in arrintaasi isu rogto is-ka-hor-imaad dhex mara laba kooxood.

28. Gabbacyeeyow = leexleexdow; isagoo orod ku jira hadba dhan u janjeersadow

Sidaasoo kale ayaa dhulka dalsanka ah ee deegaanta fiicani ka baxdo loogu herdami jirey, iyadoo marba qolada ku sugani isku deyi jirtey inay dadka kale iyo xoolahooda ka ceshiimaysato, qolyaha kalena ku dadaali jireen inay ama la wadaagaan ama ka barakiciyaan. Sida badan dagaalka daaqa la xiriiraa wuxuu iman jirey marka, jiilaal dheer ka dib, roobku dhulka ku soo kala hor maro, oo dhowr beelood isku mar u soo hayaamaan meel hogoli heshay oo doog fiican sahannadii ku soo arkeen. Dadka iyo xoolaha faraha badan ee mar keliya isugu yimid deegaan baaxaddiisu kooban tahay ayaa kicin jirey shaqaaqo iyo isku-dhac mararka qaarkood si fudud uga dhalan jirey kaftanka iyo ciyaaraha dhallinyarada ama baadida xoolaha ee la kala garto.

### *3. Dumarka*

Arrimaha kale ee Soomaalida, guud ahaan, isku-dhaca ka dhex dhalin jirey waxaa ka mid ahaa, naag la kala qaaday ama gabar la fara-xumeeyey godobteeda oo aan la bogsiinnin.

Waxaa dhici jirtey waayadii hore in naag nin u dhaxday ama u doonnan uu nin kale dhaco, isagoo raba inuu afo ka dhigto. Arrintaas waxaa tusaale fiican u noqon kara gabadha ku caan baxday magaca "Tafa-Dhiig" taas oo ay iskaga hor yimaaddeen, ayna kala dhaceen, labada nin ee la kala oran jirey Af-Xakame iyo Cali Duullane, dhiig badanina darteed u daatay.

*Waxaa Tafa-Dhiig markeedii hore loo soo raray Cali Duullane oo ka yarad bixiyey. Iyadoo awr badani u raran tahay, una socota degmadii Cali Duullane, baa waxaa dhexda ka qabsaday Af-Xakame oo, markuu ogaadey in Cali loo wado, yiri: "Cali ma istaahilo naag sidan u eg; tan oo kale aniga uun baa u qalma. Nin aan aniga ahaynna loo dhisi maayo". Af-Xakame oo ay Cali xigto ahaayeen, xurgufina ka dhexaysey, wuxuu markiiba bixiyey geel badan oo uu yarad ahaan ugu diray gabadha aabbaheed, iyadiina meeshaas buu ku mehersaday oo kula aqal galay. Markii arrintaas laga war helay, waxaa ka dhashay xiisad iyo xamaasad aad u badan, taas oo ay sii dhiirri-geliyeen dad doonayey labada nin isku-dhacooda, waxayna ka tiriyeen gabayo ay ka mid ahaayeen:*

**Geel waa la kala xoogi jirey, xubin rag weeyaane**
**Wax xiniinyo-go'ay naag ninkii, laga xeraystaaye**

*Maalintii dambe ayaa Cali Duullane beeshii Af-Xakame soo weereray, iyadoo guryihii laga maqan yahay, gabadhiina kala tegey. Dadkii xamaasadda wadey baa gabayadii halkii ka sii waday, iyaga oo markan Af-Xakame guubaabinaya, waxayna yiraahdeen:*

**Naagtii cadceedda u ekayd, ama cirkoo roob leh**
**Naagtii cureejida[29] qabtiyo, marada caarreey ah**
**Naagtii curboonayd[30] sidii, Cadan dharkii yiilley**
**Naagtii cidhbaha looga raray, korammo ciiraaya**
**Ninba maalin bay caashaqdaa, caga-wadaadley e**
**Maantana tallaabo-cutiyaay[31], Cali miyay raacday**

29. Cureeji = midab ka mid ah midabbada fardaha ee la jecel yahay; halkan waa maro ama garbasaar midabkaas leh

30. Curboonayd = cusboonayd; quruxda aan la farafarayn lahayd

31. Tallaaba cutiya = tii lahayd tallaabada deggan ee aan dhererka iyo dheerayntu toona ku jirin.

*Arrintii waxay socotaba waxay keentay in Cali iyo Af-Xakame oo laba ciidan kala wataa ay hubka isu soo qaataan oo dagaal iskaga hor yimaaddaan. Goobtaas rag badan oo labada dhinacba ah baa ku naf waayey, waxaana ka mid ahaa labadii nin ee hoggaamiyeyaasha ahaa ee naagta isku hayey, Cali iyo Af-Xakame.*

Beri dambe, isagoo ka faalloonaya tala-xumada khasaarahaas keentay, Ismaciil Mire wuxuu gabay ku yiri:

**Af-Xakame karkabadii$_{32}$ u ay, iyo kulaylkiiye**
**Ka dambee Caluu yidhi intuu, kaaha guursadaye**
**Kii kalena kaal$_{33}$ weyn u tumey, karina waabay e**
**Ragow kibirka waa lagu kufaa, kaa ha la ogaado**

Waxaa iyana dhici jirey is-maan-dhaafyo dhallinyarada ku dhex mara goobaha ciyaaraha ee ay isugu yimaaddaan, iyadoo ay dhici jirtey in laba wiil u tartamaan soo-jiidashada gabarta ciyaarta bilaysa, arrintaasina gaarto heer gacanta laysula tago. Ama waxaa dhici jirtey in gabarta lala ciyaarayo aabbaheed ama walaalkeed goobta yimaaddo isagoo doonaya inuu gabarta ciyaarta ka kaxeeyo, dhallinyaradii qaar ka mid ahina isku dayaan inay ka reebaan, halkaas oo dagaal ka dhaco, dhibaatana ka dhalato, taas oo mararka qaarkood noqon jirtey mid labada qabiil ku baahda.

Khilaafyo adag baa bulshada beer-iyo-xoolaleyda ah iyadana ku dhex mari jirey dhinaca gabdhaha oo mararka qaarkood gaari jirey heer aan labada beelood dab kala qaadan. Taasi waxay inta badan ka dhalan jirtey xeerkii gabdhaha ka yiil oo lagu xadgudbey. Tusaale ahaan...

*...laba reer oo Wanlaweyn dega ayaan ilaa maanta kala guursan sababtoo ah gabar la boobay oo lagu soo toddobaystay$_{34}$ ayaa markii gurigoodii lagu soo celiyey aan la soo raacin xaalkii laga filayey. Reerkii gabarta dhalay baa inantoodii joof u jaray (timihii baa laga xiiray waxaana loo reebay in yar oo food ah). Weerar ayaa reerkii gabarta guursadey soo qaadeen oo mar kale ayay qafaasheen. Dabadeedna reerkii dhalay ayaa ka daba duuley oo gabartoodii soo dhacsaday, arrintaasna dood iyo dagaal xun baa ka dhashay; waxaana qasab noqotay in labadii reer la kala dhex galo. Aakhirkii, waxaa lagu kala faataxaystey in aan mar dambe la kala guursan.*

Bulshada koonfurta ee beeraleyda iyo xoolo-dhaqatada isugu jirta waxaa xeer u ahayd in haddii nin la baxo gabar nin kale u doonnanayd laga qaado xaal loo yaqaan "min-dumis" oo looga jeedo in ninkaasi dumiyey guri dhismi lahaa.

32. Karkabadii = dirqiskii; mixnaddii; dhibaatadii
33. Kaal = waran af ballaaran
34. Toddobaystay = toddoba habeen aroos ku soo jirtey

## *4. Qabka iyo Gar-Diidka*

Dagaallada dadka reer-guuraaga ah ka dhex dhici jirey waxaa mararka qaarkood ugu xumaa kuwa ka kaca gar-diid la xiriira wax la kala tabanayo oo la iska jid-marin waayey, iyadoo ay weliba raacaan qab, kibir iyo quursi, sidii dhacday markii...

> *...nin la odhan jirey Aadan Galaydh uu diidey in uu hal keliya ku daro magtii laga bixinayey nin uu wiilkiisu diley isagoo leh: "Hasha waan bixin lahaaye, summadda sidee laga odhanayaa?! Ma suuroobi karto hal summadda Aadan Galaydh wadata in geel kale lagu dhex arko". Inkastoo, tolkii iyo wiilkii uu dhalay ee wax dileyba ay in badan ku baryeen inuu hashaasi bixiyo, Aadan arrintaas wuu iska soo taagey. Taasi waxay keentay in nabaddii la raadinayey cirka ku laalanto, qoladii Aadan iyo qoladii ninka laga dileyna ay dagaal isku qaadaan, cid dhimatana waxaa ugu horreeyey wiilkii uu Aadan dhalay ee uu diidey inuu naftiisa ku badbaadiyo hasha magta lagu darayo. Dagaalkii xaajadaas ka kacay wuxuu noqday mid daba dheeraaday, dad badan oo labada dhinacba ahna galaaftay. Aadan ruuxiisii waxaa maalintii dambe diley Boos-Illaawe oo ahaa nin uu quudhsaday oo inta la qabtay isaga iyo saddex walaalihiis ah keligiis la sii daayey iyadoo la leeyahay: "War nacaskan isha li'i waxba dagaal ka tari maayee, inaga daaya, habartii dhashay ha u dhaamiyee." Markii la dul yimid Aadan oo dhaawac ah, laakiin naftii ka sii baxayso, ee la yidhi: "Aadanow, maantana bal warran". Waxaa hadal ugu dambaysey: "Adduun i khatal! Maantii aan tamar hayey, talo ma hayn; maanta oo aan talo hayana, tamar ma hayo."*

Guud ahaan, colaadaha ka dhasha kibirka iyo quursiga waxa ugu wacnaan jirey heerka xun ee ay gaaraan iyadoo inta badan falka quursiga uu wehelin jirey hadal gef ah kaasoo qofka loo geysto fal kasta kaga xumaa, godobtiisuna aanay hari jirin. Sida Qamaan Bulxan gabay ku sheegay:

**Hadalkaan samayn wuxuu taraa, sun iyo waabay e**

Salaan Carrabeyna waa kii lahaa:

**Afku wuxuu la xoog yahay magliga[35], xawda[36] kaa jara e**

Soomaaliduna waxayba oraah u lahaan jirtey:

**Afxumo nabadna way kaa kaxaysaa, colaadna waxba kaagama tarto.**

Falka kibirka ku salaysan waxaa suuragal ahayd in la illaawo, laakiinse waxaan hari jirin oo hibashadiisu raagi jirtey, colaaddana qaraarayn jirey wuxuu ahaa hadalka gefka iyo meel-ka-dhaca loo bareeray ka soo jeeda.

---

35. Magli = amley; toorrey
36. Xawda = nafta

## *5. Beeraha*

Waxaa kale oo jirey, welina jira, qaybo aan yarayn oo ka mid ah bulshada Soomaaliyeed kuwaas oo dhaqashada xoolaha ku darsaday qodaalka iyo tacabka beeraha ama noloshoodu gebi ahaanba ku dhisan tahay beeraha. Degaankooduna wuxuu u badan yahay dhulka u dhexeeya labada webi, Juba iyo Shabeelle, gobolka Jigjiga iyo degmooyinka Gebiley iyo Boorame. Iyaga ruuxooda mar mar ayaa colaado ka dhex dhici jireen inkastoo dagaalladoodu ay ka yaraayeen, tiro iyo laxaadba, kuwa ka dhex dhici jirey reer guuraaga.

Guud ahaan, waxa laba reer ay dhul ku dagaallami jireen, haddii dhulkaasi markiisii hore ahaa mid dadka ka dhexeeya oo la wada daaqo, oo kolkaas qolo gaar ihi doonto inay beero u rogto, iyadoo aan arrintaas kala heshiin qolyihii kale. Muranka arintaasi ka dhashaa wuxuu mar mar noqon jirey mid keena dagaal ay reero iskaga hor yimaaddaan. Inta badanse waxyaalaha ay dagaalladoodu ka kici jireen waxay u badnaayeen qaar la xiriira khilaafaad shakhsi ah oo ka dhasha ijaar ama soohdimaha beeraha oo laysku qabto iyo biyo qaybsiga.

Gobollada Bay iyo Bakool oo beeraleydu ku badan tahay, is-ka-hor-imaadka ka dhex dhacaa wuxuu u badnaa midka soohdimaha, madeyaasha la isku soo durko, oo dhulkaas looga yaqaanno "**daar-siib**"(Dacar-siib). Badanaa astaamaha ugu waaweyn ee lagu calaamadiyo soohdimaha beeruhu waa geedka dacarta oo lagu beero. Qof belo-wade ah ayaa inta badan yimaadda oo tii oo aan la dhaadeyn dacartii soohdinta ku astaysnayd siiba si uu muran u geliyo xuduudda beertiisa iyo beerta ku xigta, halkaasoo uu ka dhasho buuq mar mar isu roga dagaal laba qabiil dhex mara; inkasta oo dadka labada webi ay had iyo jeer dad nabadeed ahaayeen, kuna ducaysan jireen:

**"Alan baas dabkii shidey, Ilaahay minii rido"**

oo micnaheedu yahay,

**"Wiil baas-qabe ahi dabkuu shido, Ilaahay naguma rido"**

Mararka qaarkood, nin xoolo-dhaqato ah ayaa beer nin kale leeyahay, saracii oo ku yaalla, ku sii daaya xoolihiisa si ay u daaqaan, ama xoolaha ayaa iskood u gala beerta oo khasaare gaarsiiya mirihii ka baxay. Halkaana waxaa ka yimaadda is-ka-hor-imaad, kaas oo aan badanaa noqon dagaal faraha ka baxa. Taasi waxay dhacda markii xeerkii u yiil ay gudi weydo ciddii gar loogu yeeshay.

## *6. Diinta iyo Khilaafka Dariiqooyinka*

Intaas aannu soo sheegnay waxaa weheliyay, oo Soomaalida badankeedu ka sinnayd dagaallo diineed, ama degaan, oo ka dhex dhici jirey dadka Soomaaliyeed ee Muslinka ah iyo dadyowga deriska la ah ee diinaha kale haysta. Isla markaas waxaa Soomaalida mararka qaarkood ka dhex dhici jirey iska-hor-imaadyo hubaysan oo la xiriira aragtiyaha (dariiqooyinka) kala duwan ee diinta Islaamka ee la kala haysto.

Dagaallada dariiqooyinka waxaa ugu caansan dagaalkii Jameecada Baardheere kaas oo dhacdooyinkiisii naloogu soo tebiyey sida soo socota:

*Degaanka u dhexeeya Afgooye iyo Wanlaweyn, oo ay mar ka talin jirtey saldanaddii Geledi, ayaa waxa ka jirtey dariiqada Qaadiriya oo keliya, taas oo suldaanku madax u ahaa. Wadaad la dhihi jirey Sheekh Ibraahin Xasan Jeberow ayaa damcay inuu nawaaxiga Wanlaweyn ka asaaso dariiqada Axmediya, waase loo diidey. Dabadeed, wadaadkii wuxuu u haajirey galbeed sannadku markuu ahaa 1820, wuxuuna xarun hirgashay dariiqada Axmediya uga dhisay Baardheere. Xer tiro badan ayuu helay, wuxuuna shaqo uga dhigay diin barasho iyo tacab beereed. Xaruntiina wuxuu ku magacaabay 'Jameecada Baardheere'. Sheekh Ibraahin markuu geeriyoodey waxaa xilkii jameecada la wareegey Shariif Ibraahin, ku-xigeenna waxaa u noqday Shariif Cabdiraxmaan.*

*Suldaan Yuusuf Axmed, oo ahaa madaxii dariiqada Qaadiriya, wuxuu dareemay in dariiqada Axmediya ee ka hana-qaadday Baardheere ay halis ku tahay dariiqadiisa. Dabadeed wuxuu go'aansaday inuu tirtiro Jameecada Baardheere. Sidaas darteed, wuxuu qaaday olole ballaaran, wuxuuna dadweynihii saldanaddiisa ku hoos jirey ee raacsanaa afkaarta Qaadiriya ku amray inay jihaad u guntadaan si loo cirib-tiro kooxaha Axmediya ee dariiqadooda la loollamaya.*

*Sannadkii 1843 ayaa Suldaan Yuusuf, oo hor kacaya ciidan afartan kun lagu qiyaasay, uu ku duuley Jameecadii Baardheere, halkaasna dagaal lagu hoobtay iyo xasuuq naxariis darro ah baa ka dhacay. Xertii Baardheere, iyadoo colka ku soo duuley uu ugu yaraan shan jeer ku soo labanlaabmayey, si fool xun ayaa loo gumaaday, culimadii goobtaas ku geeriyooteyna waxaa ka mid ahaa labadii hoggaamiye ee Jameecada, Shariif Ibraahin iyo Shariif Cabdiraxmaan. Dhammaan beerihii iyo guryihii Jameecada Baardheere waa la gubey, dabkuna bil iyo dheeraad buu qiiqayey, Baardheerena labaatan sano oo dambe bay lama-degaan ahayd.*

*Sayid Maxamed Cabdille Xasan ayaa isaguna dabayaaqadii qarnigii 19aad ka soo degey jasiiradda Carabta isagoo wata dariiqo la yiraahdo Saalixiya, dadkana ugu baaqaya inay jihaad kala hor tagaan shisheeyaha dalkoodii qaatay, diintoodiina dooriyey. Hase yeeshee, waxay markiiba madaxa isla galeen hoggaamiyeyaashii dariiqooyinka Qaadiriya iyo Axmediya ee dalka ka sii jirey, kuwaasoo u arkay in dariiqada uu wataa kuwooda khatar ku tahay, ujeeddadiisuna tahay inuu samaysto boqortooyo diineed, halka isaguna kaga eedaynayey inay gumeysteyaasha gacan-saar la leeyihiin. Khilaafka Sayid Maxamed iyo madaxdii dariiqooyinka kale wuxuu heerkii ugu xumaa gaarey markii 1909 daraawiishtiisu xukun dil ah ku fulisey Sheekh Aweys Maxamed Al-Baraawi (Aweys Dheere ama Aweys Al-Qaadiri) oo fadhigiisu ahaa tuulada Biyooley.*

## *7. Dhaqanka*

Waxaa isla markaas jirta in dhaqanka Soomaalida laf-ahaantiisu, ilaa xad, ka qayb qaadan jirey dhiirrigelinta dagaallada iyo in khilaafaadka xoog lagu xalliyo, iyadoo ninka wax dila ama wax dhacaa uu ahaa nin la ammaano, halka qofka nabadda ka taliya lagu tilmaami jirey in uu yahay mid jilicsan ama hamranaya[37].

37. hamranaya = ka cabsanaya waxa falka uu geysto ka dhalan kara ama dhibaatada ka soo gaari karta

Waxaa inta badan taariikhda Soomaalida lagu xusaa ninka ku caan-baxa belo-talinta iyo hurinta colaadaha. Arrintaasi waxaa laga yaabaa inay ku sal-leedahay duruufihii qallafsanaa ee nolosha reer-guuraaga Soomaaliyeed eekhasbaysey in loollan iyo is garbin joogto ah loogu jiro sidii loo kala riixan lahaa khayraadka kooban ee dabiicaddu ku deeqday (biyaha, baadka, xoolaha), iyo dhaqankii duullaanka iyo dhaca geela ku dhisnaa, kaasoo qofka ku kallifayey inuu col iyo dhiillo heegan u ahaado, debec iyo naxariisna ka fogaado. Noloshaas ciriiriga ahi waxay keentay in nin waliba isku dayo inuu noqdo kan wax bursada, ee uusan noqon kan laga bursado, hantida uu qaabkaas ku helayna waa ku faani jirey, sida laga arki karo ereyada tixdan uu gabayaagu ku xodxodanayo[38] gabadh uu guurkeeda rabey:

**Ina Diiriyaay heensahaa, debedda noo yaalle**
**Duul lagu anfacay baannu nahay, col iyo duullaane**
**Iska soo dawaaf[39] waxaan ku geyn, daas[40] karuur badane**

Dhaqanka colaadeed ee sidaas ku abuurmay wuxuu ahaa mid dagaalka dhiirigelinaya. Sidaas oo ay tahay, xarraga-dirirka iyo biri-ma-geydada lagama tegi jirin.

38. Xodxodanaya = raba inuu soo jiito; "shukaansanaya"
39. Dawaaf = wareeg; socdaal
40. Daas = guri; aqal

# Hab-dhaqankii dagaallada iyo duullimaaddada

Marka aan ka hadlayno Soomaalidii hore, ulama jeedno dad taariikh hore jiri jirey oo dhammaaday, ee waxa aan ula jeednaa hab-dhaqankii xoolo-dhaqatada Soomaaliyeed ee ilaa maanta jira. Waxaan maskaxda ku haynaa, oo bandhiggan ugu talo-galnay, dadka ku barbaaray magaalooyinka ee uu dhaqankaasi u yahay tagto, sheeko ku ah. Haddaba, hore ayaa loo yiri: "**Marka aad tagtadaada taqaanno, ayaad timaaddadaada ka talin kartaa**". Wixii xumaan ahaa ee dhaqankaaga hore lahaana waa in aad ka tagtaa, intiisa wanaagsanna aad xaslataa[41].

## *Reer-Guuraaga*

Haddaba inta aynaan u gelin hab-dhaqankii wanaagsanaa ee Soomaalidii hore, waa in aan wax ka iftiiminnaa, dagaalladooda laf-ahaantooda, kuwaas oo ahaa dagaallo qabiil qabiil ku salaysan. Hawlgallada kala duwan ee dagaal waxay lahaayeen magacyo tilmaamaya ujeeddada hawlgalkaas iyo qaab dhismeedka ciidanka fulinaya. Hawlgalladaas dagaal waxaa ugu waaweynaa afar nooc oo kala ah:

1. Duullaan
2. Raacdo
3. Gaaddan
4. Wareemato

Haddii aan mid mid faahfaahin uga bixinnana waa sidatan soo socota:

### *1. Duullaan*

Duullaan waa weerar ama col-weyne hubaysan oo guddoonsadey dagaal, waxaana hawl-galkiisa ka mid ahaa marka colka la isu keeno, abaabulka iyo qorshuhuna u dhammaadaan, in la caleemo-saaro abbaanduulaha (ammaanduulaha) colka madaxa u noqonaya iyo ku-xigeennadiisa yeelan lahaa hoggaaminta ciidanka haddii abbaanduulaha la dilo ama la dhaawaco ama uu bukoodaba.

Shuruudaha abbaanduulaha lagu caleemo-saari jirey waxa ka mid ahaa: inuu yahay nin geesi ah, dagaalyahan ah, haybad iyo dul-qaadba leh, aqoonna u leh maamulka colka iyo sida loo dagaalgeliyo, dhaawaca ku dagaallama oo aan marnaba ka tegin; tolkiina aan ceeb u keenin; dagaalkana buruud ku leh; duullaammo horena libin ka soo hooyey.

Sida badan, colku wuxuu ka koobnaan jirey qabiil qura ama laba ama saddex qabiil oo isu hayb dhow, kuwaas oo degaan kulmiyo, dan-wadaagna ah. Ugu horraynba abbaanduuluhu waxa uu colka u qaybin jirey qabiil qabiil, haddii uu dhawr qabiil ka kooban yahay, iyo jilib jilib, haddii uu qabiil keliya ka kooban yahay; isaga oo ragga isu raacinaya hadba sida ay isu xigaan si ay hadhow isugu hilba-diriraan oo aanay dhaawacooda uga tegin. Waxa uu hubin

41. Xaslataa = hanataa; ku dhaqantaa; meel marisaa

jirey tirada iyo nooca hubka la sito, wareegada[42] la wato iyo tirada ciidankaba si uu wax walba isugu jaan-gooyo. Marka colku diyaar u noqdo inuu dareero, ayaa abbaanduuluhu ku dhawaaqi jirey magacyada labada nin ee gabayaaga iyo faaliyaha colka kala noqonaya, wuxuuna sheegi jirey habka loo soconayo iyo meesha laysku sugayo inta aan weerarka kama-dambaysta ah la qaadin.

Marka la gaaro meel qabiilkii duullaanka lagu ahaa laga weerari karo, waxaa abbaanduuluhu si degdeg ah u diri jirey koox ilaalo ah oo soo eegta meesha cadawgu joogo, dhulka geelu daaqayo, in laga digniin helay iyo in kale. Waxa uu ilaalada kula ballami jirey meel la isla yaqaanno iyo ammin sugan.

Marka ay ilaaladu warbixin sugan keento ayaa abbaanduuluhu colka u dareerin jirey in la hilibo-qasho, fardaha la waraabiyo (waa colku haddii ay fardo wataan), kabaha suumanka loo adkeeyo iwm. si colku weerar ugu darbado[43]. Isaguna la-taliyeyaashiisa ayuu gooni ula bixi jirey, si weerarka loo habeeyo. Marka uu colku diyaar u noqdo, ayuu inta faras ama rakuub[44] fuulo colka dhexdiisa ka bixin jirey talooyinkii (amarradii) ugu dambeeyey ee lagu hawl-gelayey.

Hab-dhaqanka goobta dagaalka ee abbaanduulaha iyo colkiisu wuxuu ku xirnaa hadba ujeeddada markii hore duullaanka loo soo abaabuley, taasoo noqon karaysey dhiig-doon[45] ama dhaqan-doon[46] ama labadaba. Dhinaca qorshaha iyo abaabulka duullaan oo dhammi iskaga mid buu ahaa, wuxuuse ku kala duwanaa iyadoo marka ujeeddada duullaanku ay tahay dhiig-iyo-dhaqan-doon uu abbaanduuluhu bixin jirey amarro ay ka mid yihiin kuwa hoos ku xusan:

1. Sidii xeerka Soomaalidu ahaan jirey yaan laga gudbin marnaba.
2. Tolkeen yaan ceeb loo soo duwin; xishood iyo gobannimo ku dirira.
3. Ninkii cadawgeenna ah ee aan biri-ma-geydo ahayn yaan la bixin.
4. Maatida, sida haweenka, carruurta, waayeelka tabar-gabay, iwm., yaan la dilin.
5. Culimada diinta ee Ilaahood u raran yaan la taaban.
6. Dadka col-moogga ah oo aan dagaalka ku jirin ka leexda.
7. Dhaawaceenna yaan laga tegin ee ha lagu dhaawac-diriro.
8. Dhaawaca cadawgeenna yaan la is raacin ee ha laga tago.
9. Hebel iyo hebel haddii nolol ama dhaawac lagu qabto yaan la dilin ee abbaanduulaha ha lagu soo simo.
10. Nin colkeenna ka mid ihi ninka uu ku hagoogto, ama ninka nin inaga mid ah magaciisa sheegta ee magan gala, ha la dhaafo oo yaan la dilin.
11. Geela iyo fardaha xoogga saara, waxa aad ka aragtaanba ku mintida; hubkana furta.
12. Raaflahada (lo'da iyo ariga) xaasaska u dhaafa; gabar idinku barooratay neefka ay ku oydana uga taga.
13. Guryaha ha gelina, waxa hoos yaallana ha eegina, hadda biyo-ka-cabbiddu ma reebbana.

---

42. Wareegada = saadka ama sahayda dagaalka loo qaato
43. Darbado = diyaar noqdo
44. Rakuub = awr dagaalka loo fuulo
45. Dhiig-doon = inuu rag laayo raba
46. Dhaqan-doon = inuu xoolo dhaco raba

## *Xoolo-iyo-Beeraleyda (Dhulka Labada Webi)*

Dhinaca xoolo-iyo-beeraleyda, gaar ahaan kuwa dega dhulka labada webi u dhexeeya, waxaa abaabulka iyo hoggaaminta ciidanka qaabilsanaa laba nin oo lagu kala magacaabi jirey malaaq iyo garaad. Malaaqu wuxuu ahaa abbaanduulaha ciidanka isagoo hor socon jirey colka xilliga dagaalka. Garaadku wuxuu ahaa kaaliyaha malaaqa, wuxuuna daba socon jirey ciidanka, isagoo ku guubaabinaya inay dagaalka hore u galaan, kana ilaalinaya inay dib u jeestaan ama cararaan. Labada xilba waxay ahaayeen kuwo joogto ah, hadba cidda qabanaysana waxaa soo dooran jirey odayaasha beesha. Labadoodaba waxaa ka xaaraansanayd in ay goobta dagaalka ka cararaan ama wax baqe ah muujiyaan. Midkoodii sidaas yeelaana wuxuu mudan jirey ciqaab, casilaad iyo gabartiisa oo aan la guursan, sida ka muuqata oraahdan:

> **Malaaq muudee maaye ma roorow; garaad garguuradee maaye gadaal miin gaddoomaw.**

Taas oo macnaheedu yahay: Malaaq inuu dagaalka hore u galo mooyee, ma cararo; garaadna inuu gurguurto mooyee gadaal uma gaddoomo.

Dadka labada webi, xilli dagaal iyo xilli nabadeedba, aad bay u tixgelin jireen ugana dambayn jireen amarrada ay bixiyaan malaaqa iyo garaadku, qadderinta ay u hayn jireenna waxay ka muuqataa maahmaahda tiraahda:

**Maroodi miitiisaa li wiin; ninbow malaaqshey yaa li wiin;**

oo macnaheedu yahay: Maroodi micidiisaa la weyn, nin walbana malaaqiisaa la weyn.

Waxaa kale oo dhaqanka dagaalka ee gobolladaas ka mid ahaan jirey in haddii qabiil dagaal gelayo uu jilibka curadka ahi u hor maro. Sidaa darteedna waxaa dhici jirtey in khasaaruhu isaga u bato. Tusaale ahaan, waxaa jira shirib oranaya:

**Aw Hiyaamow hor adi lee; haadda aamowshee indiiddoy**;

oo macnaheedu yahay: Hiyaamow (waa jilibka ugu weyn Hubeer) idinkaa leh in aad dagaalka ku hor martaan ee ha diidina in haaddu idin cunto.

Haddii labada col ee dagaallamaya mid jabo oo cararo waxaa reebbanayd in la eryado.

Dagaallada Raxanweynta dhexdeeda ah, waxaa malaaqa iyo garaadku ciidankooda ku guubaabin jireen in ay furtaan tirada ugu badan ee ka mid ah hubka iyo qalabka kale ee dagaal ee cadowga, waxayse ka reebi jireen in ay dhacaan xoolaha nool sida geela, lo'da, iwm., iyo wixii hanti ah ee kale ee dadku gaar ahaan u leeyahay, inkastoo dhaca xooluhu u furnaa marka la is hayo cid Raxanweynta ka baxsan, falkaasna iyadu ku horreysey.

Maadaama dadka labada webi dhexdooda degaa ay ahaayeen dad sida badan beeraley ah oo deggan, dagaalladooda kama dhalan jirin wax is barakicin iyo degaan-kala-riixasho ahi, qabiilkii adkaadaana degaankiisii ayuu ku soo noqon jirey isagoo ciyaaraya oo shirbaya.

# Biri-ma-geydo

Ereygani asal ahaan wuxuu ka soo jeedaa dhirta aan la goyn jirin iyadoo lagu tix-gelinayo harkooda, mirahooda, madinimadooda ama barakadooda. Isla markaa waxaa loo isticmaali jirey xoolaha qaar ay ka mid yihiin awrka lagu guuro, neefka irmaan ama neefka rimman oo in la bireeyaa ay reebbanayd. Markii dambese waxaa ereyga loo adeegsadey dadka aanay bannaanayn in la dilo ama si kaleba loo dhibaateeyo xilliga colaaduhu jiraan iyo xilli kaleba iyadoo waxyeelladooda looga fogaanayo xag ceebeed, xag caaqiibo[50] iyo xag cuqubo.

Ereygan "biri-ma-geydo" magacyo kale baa meelaha qaarkood looga yaqaan, kuwaas oo ay ka mid yihiin: Xushmadleyda xumaha ka reebban, lama-taabtaan iyo lama-dilaan.

Sida aynu soo aragnay, Soomaalida dagaallo way ka dhex dhici jireen, sababuhu waxay doonaan ha noqdeene. Hase yeeshee, waxay mar walba dareensanaayeen in ay yihiin dad is-hurran oo aan kala maarmi karin, iyo in dagaal walba, muddo kasta ha qaato heer kastana ha gaaree, nabadi ka dambayn doonto. Sidaas darteed waxay iska ilaalin jireen in colaadda lagu talax-tago oo la gaarsiiyo heer lagu kala calool-go'o, oo aan berrito laga heeshiin karin, lagana soo ceshan karin xiriirkii sokeeyenimo, qaraabo iyo derisnimo ee dadka u dhexeeyey. Markaas, inkastoo la colloobo oo la dagaallamo, wax baa la iskula hari jirey, waxaana jirey waxyaabo laga sarriigto[51], sida uu tilmaamayo gabayga Sayid Maxamed Cabdille Xasan ee hal-ku-dheggiisu yahay:

**Maandhow asxaan lagama tago, eed haddaad faliye**

Ama sida ka muuqata maahmaahda Soomaaliyeed ee tiraahda:

**Gobi geed ma goyso; hadday goysana gunta kama jarto.**

Dadka Soomaaliyeed waxay ahaayeen dad sharaftu la weyn tahay, sumcaddoodana aad u ilaashada. Ninkii, ama qabiilkii, falal foolxumo ah oo diinta iyo dhaqanka khilaafsan ku kaca xilliga colaadda iyo dhibaatadu jiraan, wuxuu marka dambe noqon jirey mid cambaaraysan oo bulshada ka takooran; waqtigii uu foolxumadaas ku kacayna waxaa lagu tilmaansan jirey: sannadkii uu hebel, ama reer hebel, leexday ama gumoobey. Si aan taasi u dhicin, waxaa la isku guubaabin jirey marka xaaladahaas oo kale lagu jiro oraahda ah:

**Waar hooy, waa la doogiye, yaan la dacaroon.**

Fal-colaadeedka ku-talax-tagga iyo bahalnimadu ku jiraan ee ka baxsan xeerka iyo dadnimada waxaa la oran jirey cuqubo ama caaqilo, taasoo la rumaysnaa in cawaaqib-xumadeedu ay cidda gasha facyaal badan la socon jirtey, sida ka muuqata tuducyadan ka mid ah gabay uu tiriyey Cabdi Gahayr:

**Caaqilo halkii lagu galay, caw ku huruddaaye**
**Carruurtay ka laysaa ninkii, caano baas dhama e**

50. Caaqiibo = cidhib; aayatiin; sida wax ahaan doonaan mustaqbalka
51. Sariigto = xishoodo; iska dhawro; maago

Si loo hubiyo in aan sharafta iyo gobannimada marna laga tegin, waxay Soomaalidu dhigatay xeer adag oo si cad u qeexaya cidda ay tahay in la nabad geliyo, iyo waxa ay tahay in la dhawro, xilliga colaadda. Xeerkaas waxaa loo yaqaan **xeerka biri-ma-geydada**.

Nin gabayaa ah oo la yiraahdo Dallaayad baa wuxuu ku yiri tix uu arrintan kaga hadlayey:

**Cirkanoo gobshoobiyo$_{52}$ dhulkoo, goosi$_{53}$ laga waayey**
**Gudintiyo hangoollada markii, guunyo$_{54}$ lagu doojo$_{55}$**
**Dhirtaba geed malko$_{56}$ ah baa jiriyo, lama-garaacaane**
**Biri-ma-geyduu dadkuna leeyihiyo, lama guhaadshaane**
**Gardarriyo ninkaan lagu ogeyn, gacan-fudayd toona**
**Ee gana tukubihiisa waa, lagu gargaaraaye**
**Gudo baas mid laga keenayoo, garaca mooyaane**
**Ma gilgilo duqaytida ninkii, aw ka soo go'aye**

Xeerka biri-ma-geydadu wuxuu saameynayey noocyo gaar ah oo dadka ka mid ah, kuwaas oo ay ahayd in mar walba xannaano iyo daryeel mooyee, aan wax dibindaabyo ah loo geysan; dilna hadalkiisaba daa. Xeerkaas dhawristiisu waxay ahayd mid ahamiyad gaar ah la siiyo xilliga colaadaha, dadka uu khuseeyana waxa ka mid ahaa: maatada, culimada, maganta, martida, ergada, hoggaamiyeyaal dhaqameedka, safarka, hub-ma-leytida iyo col-moogga. Kooxahaas waxyeelladooda waxaa looga fogaan jirey iyadoo laga baqayo ceeb ama cuqubo ama iyadoo caaqiibo la xeerinayo.

## *1. Maatada*

Maatadu waxay ka kooban tahay dumarka iyo carruurta oo la isku yiraahdo "maxas", waayeelka iyo bukaanka saan-jiifka ah, kuwaas oo dhammaantood ah dadka jilicsan ee aan is difaaci karin, sidaa darteedna ay ceeb ahayd in lagu taagsado ama si kaleba wax loo yeelo.

### **<u>b) Dumarka iyo Carruurta:</u>**

Dumarka iyo carruurta waxaa dilkooda laga dhaxli jirey ceeb, cuqubo iyo caaqiibo-xumo intaba. Ninka dumarka iyo carruurta ku hoos-noqda waxaa loo arki jirey nin fuley ah oo ragga dagaalkiisa ka soo baqay kuna ciil-baxaya ama ku caro-burburaya maatada laynteeda. Dhinaca kale haddii laga eego, dumarka iyo carruurtu waxay ka dhignaayeen beertii iyo abuurkii suura-gelinayey taranka iyo waaritaanka mujtamaca, haddii la laayana waxay noqonaysey sidii geedkii gunta laga jaray, taas oo bulshada u horseedi lahayd dhammaad iyo dabar-go'.

---

52. Gobshoobey = gudhay; di'i waayey
53. Goosi = daaq; wax xooluhu goostaan
54. Guunyo = xoolo; duunyo
55. Doojo (doojiyo) = ku simo xilliga roobka; abaarta ka soo gudbiyo
56. Malko = mudan oo waxtar lagu qabo

Ninka maatadiisa la laayey waxay ku ahaan jirtey arrin uusan abidkiis ka samrin nabadna ka qaadan. Sidaas darteed, maata-layntu waxay keeni jirtey colaad aan demin iyo godob aan harin, sida ku cad oraahdan:

**Maato la laayey maalo[57] reebtay**

Waxyeellaynta maatada iyo fal-colaadeed kasta oo ku sifooba foolxumo iyo xad-dhaafnimo waxaa lagu tilmaami jirey **hiiro**, oo macnaheedu yahay "falkii hiirtaanyada ama uur-ku-taallada reebayey", waana kii laga yiri:

**Hanti waa la illaawaaye; hiiro lama illaawo**

Utunta[58] aan harin ee ay lahayd maatada la laayaa, waxaa si fiican looga arki karaa sheekadan gaaban:

*Nin Xuseen Gaafoote la oran jirey baa yaraantiisii loo sheegay in aabbihiis rajaynimo ku koray oo hooyadiis (waa Gaafoote ayeydiise) isagoo yar dhimatay kaddib markii col reerka ku soo duuley ay geelii, iyadoo hor taagan, ku didiyeen oo jiirsiiyeen....*

*Xuseen Gaafoote, markii dhagartaa foosha xun looga sheekeeyey, aad ayuu uga xumaaday, waxaanay ku noqotay uur-ku-taallo xanuunkeedu ku mudan yahay. Waxay cadho ku gadhoodhsanaataba, markii uu qaan-gaadh noqday ayuu reerkii dhagartaas foosha xun galay midiidin u noqday. Wax uu isha ka meeriyaba, markii uu taabba-qaaday ee uu isku hubsaday in uu wax geysan karo, ayuu habeen raggii oo gole hurda dhegta dhiigga u wada daray, waanu baxsaday.*

*Markii uu tegey meel aanay ka gaari karin, ayuu tixdan geeraarka ah ku soo sheegay sababta uu dembigaas u galay, oo fal-celin u ahayd dhagartii ka sii xumayd ee nimankaas awoowyaashood ay beri hore galeen, ee ay u geysteen mucoydiis, waxaanu yiri:*

**Daadeheeya mucoyday**
**Maxaa loo dilayey ee**
**Daanka loo jebinaayey ?**
**Ma duullaan bay wadatey ?**
**Dirir waa la yaqaannoo**
**Raggu waa is dilaaye**
**Dumar daarka[59] la gooyo**
**Ma dir baan u lahayn ?!**

**Anna diif igu raagtoo**
**Madoobaysey dubkaygaan**
**Geesiyaasha u dooxaye**
**Iyagaa damin waayaye**
**Ha dillaacdo colaaddu !!**

57. Maalo = eel ama boog
58. Utun = godob; dakano; dembi cid laga galay
59. Daarka = halbawlaha

Inkasta oo dhagarta mucoyda la diley ay beri hore dhacday, haddana furdaamintha[60] utunteeda iyo furfuridda hiirtaanyadeedu iyaga uun bay u taalley. Waxay galeen kuwa islaanta geela ku didiyey dhagar xeerkii Islaamka iyo kii Soomaalida labadaba ka baxsanayd, oo waxay tafiirtoodii u dhigeen cuqubo iyo caaqilo da'iba da'dii ka dambaysey ay ku reebtay ilaa ay aakhirkii ka galaafatay kuwo aan iyagu waxba gelin.

Dumarku dhaqanka Soomaaliyeed xurmo iyo xaqdhawr bay ku lahaayeen, waxaana loo arki jirey inaysan qabiil keliya ka tirsanayn ee ay qabaa'ilka oo dhan dhex u yihiin, waayo, qof kastoo dumar ihi qolada ay ka dhalatay waxay u ahayd gabar, qolyaha kale oo dhanna waxay u ahayd geyaan inta aanay guursan. Marka la guursado, qolada ay u dhaxday waxay u ahayd marwo, inta kalena soddoh bay ugu beegnayd. Sidaasi darteed haddii colaadi dhacdo, waxaa loo tixgelin jirey dhexdhexaadnimo, oo dagaalladu waxay ahaan jireen wax ragga is haya ku kooban. Xataa haddii ay dagaalka qolo la soo galaan, oo la qabto, guud ahaan waxba looma geysan jirin, ee iyagoo sharfan baa ciddoodii lagu celin jirey. Run ahaantii, dhibaatada iyo khasaaraha dagaalku waxay ahaayeen kuwo dumarka si dheeraad ah u taabta, iyadoo ay marar badan dhici jirtey in colaaddu dhex marto qoladii qofka dumarka ahi ka dhalatay ee aabbaheed, walaalladeed iyo ilma-adeerradeed ka tirsanaayeen, iyo reerkii ay u dhaxday ee ninkeeda, wiilasheeda iyo dumaashiyadeed ka tirsanaayeen. Markaas oo kale waxaa qofka dumarka ah xaalkeedu noqon jirey sidii ninkii la weydiiyey: "Aabbahaa iyo hooyadaa kee baa la cadaabaa?" ee ku jawaabey: "Wallaahi, arrintaas afkaan ka kala hayaa...", ama sida maahmaahda tiraahda:

**Hal laba-midigoodle dhengedeeyey dhinacna uma fayooba.**

Dhibaatada arrintaasi leedahay darteed, haweenku way ka ducaystaan, waxayna ku dhaartaan: "Waa tii aan wiil iyo walaalba waayaa..." Mar haddii dhibaatada intaas le'eg ay dagaalladu u keenaan haweenka, waxaa laga xishoon jirey in wax kale loogu sii daro. Gaar ahaan, faraxumeynta iyo kufsigu, haddii colaad lagu jiro iyo haddii kaleba, waxay ahaayeen arrimo dhaqanka iyo caadada Soomaaliyeed dibadda ka ah. Mar haddii qof kasta oo dumar ihi ama gabar ahayd, ama geyaan ama soddoh, wax aan xishood iyo xurmo ahayn ma ay mudnayn. Haddiise mid dhagar-qabe ah oo iimaanlaawe ahi uu qof dumar ah ku tala-xumoobo, waxa jirey xeerar adag oo loo cuskado, iyo habab lagu mago khasaaraha dhacay. Haddaan tusaale u soo qaadanno xeerka ay arrintaas ka leedahay beel Soomaalida ka mid ahi, dhagartaas oo kale waxaa loo daaweeyaa sidan:

1. BAARA-CAD: oo ah gabarta aan weli qaan-gaarin(da'deedu gaarin 15 jir), waxa lagu magaa **shan iyo toban halaad**.
2. BILLO-CAD: oo ah gabarta nin kale u doonnan, hase yeeshee aan weli la meherin magteedu waa **shan iyo toban halaad**.
3. GANBO-CAD: oo ah haweeneyda ninkeedii(saygeedii), dhowaanahaas uu ka dhintay ee hengeshii weli saaran tahay. Iyadana magteedu waa **shan iyo toban halaad**.
4. AFAR-KU-KACA: oo ah Islaanta waayeelka ah ee aan hantaaqada karaynin, magteedu waa **shan iyo toban halaad**.
5. HAWEENEY ISA-SIDATA: oo ah haweeney wiil dhabarka ku sidata, magteedu waa **konton halaad**.

60. Furdaamin = furfurid; xallin

6. MADAX-BANNAANEY: Waa gabarta waqtigeedii la guursan lahaa joogta, aseen weli la guursannin, iyada ninkii faraxumeeyaa waa inuu qasab ku guursadaa; wixii yarad ahaa ee laga bixin lahaana uu wada dhiibaa. Haddii uu diido waa inuu magteedii oo **konton halaad** ah bixiyaa

Guud ahaan, Soomaalidu way u dhammayd in haddii dagaal dhaco aan lagu xadgudbin dumarka, sharaftoodana wax loo dhimin. Sida runta ahna dhacdooyinka fara-xumaynta haweenka ee dagaalka la xiriiraa aad bay ugu yaraayeen Soomaalidii hore, haddiiba ay jireen. Sida badan, waxa kufsiga haweenku dhici jirey xilliga barwaaqada, waxaana ku kici jirey nin dhallinyaro ah, geeljiruhu ha u badnaadee, oo aan muddo dheer meel haween joogaanba arag.

**t) Waayeelka:**

Sidaas oo kale, ninku haddii uu weynaado oo uu gaaro da' uusan hub ku qaadi karin, dagaalna ka qayb geli karin, waxaa lagu tirin jirey maatada. Dagaal kasta oo dhaca, ninkaas oo kale dilkiisu wuxuu ahaa, sida dilka carruurta iyo haweenka, mid ceeb iyo magac-xumo laga dhaxlo, colaaddana sii fogeeya. Sheeko tilmaamaysa sida looga xumaan jirey dhibaataynta waayeelka baa waxay leedahay...

*...beri baa abaar ba'ani ku habsatey degaanka Ceelbuur, kadibna waxaa geyigaas ku baahay kooxo qawleysato ah oo ciddii ay daganti ka helaanba dhacay. Maalin maalmaha ka mid ah bay jidka ka heleen oday waayeel ah oo caano sahay ah sibraar ku wata waana ka furteen. Odaygii jicsinka laga dhacay waxaa dantu ku kalliftey inuu ku jid-maro qaraabka dabiiciga ah (sida miraha iyo xabagta), wuxuuna isagoo dhan-qalan ku dhow dirqi ku gaarey degmadii tolkiis ku sugnaa. Markuu raggii degmada joogey uga sheekeeyey wixii ku soo dhacay, waxay arrintii ku noqotay mid ay qaadan kari waayeen oo ka baxsan xeerkii Soomaalidu u lahayd taakuleynta maatada, iyagoo falka burcaddaas u arkay qur-gooyo odayga loogu tala-galay. Xiisad ayaa meeshaas ka aloosantay, waxaana isu baxay dhallinyaro ka caraysan wixii odayga cirroolaha ah loo geystey oo u ololaynaya in weerar la gesho beeshii tuugadu ka dhalatay. Si uu u demiyo fidmadii aloosantay, dagaal dhacana u hor joogsado, ayaa gabayaaga la oran jirey Caynab Diirshe, isagoo dhallinyaradii reer-tolkiis celinaya, wuxuu tiriyey gabaygan oo uu canaan iyo caqli-celin ugu jeedinayo reerkii dhallinyarada burcadda ahi ka so jeeddey:*

**Nimanka sabada Ceelbuur fadhiya, sawdka laga keenay**
**Ee aanan sifihiisa garan, waxaan ku suureeyo**
**Dhaqankeennu summad weeye e waxaan, sinaba loo sheegin**
**Siddeetan jir sunniyuhu murxeen misana, socod ku soo daaley**
**Oo saan-ku-boorre[61] ah nafluhu, kala sawaad roone**
**Saymaha colaadeed ninkaan, si xunba loo eegin**
**Sifo-xumada ay kula kaceen, saaruqiyo tuuggu**
**Ee sibraarka ay uga furteen, sahayda jiilaalka**
**Ee laga sukuudeen[62] haddana, sababna loo yeelin**
**War yaa sababay geerida hadday, beladu saan qaaddo.**

---

61. Saan-ku-boorre (jaan-ku-boorre) = ruux socoto ah oo diiftii iyo siigadii weli ku yaalliin
62. Sukuuday = aammusay

*Markii gabaygani gaarey degaankii mashaqadu ka dhacday, waxaa degdeg u shiray wax-garadkii beesha waxayna ergo u soo direen eheladii odaygii la furtay. Odayaashii labada dhinac markay isla eegeen xeerkii ka yiil dhibaataynta maatada waxay, wada xaajood kadib, ku heshiiyeen in (1) xaalmarin xuma-tir ah la siiyo beeshii cirrooluhu ka dhashay, (2) waxay ergadii timid garowsatay in falka dhacay uu ka dhignaa iyadoo ninkaas waayeelka ah la diley, sidaa darteedna waxay oggolaadeen mag bixin. Hase yeeshee, taas waa laga cafiyey iyadoo lagu bogsadey garowshiinyihii ay keeneen.*

**j) Bukaanka:**

Bukaanka saan-jiifka[63] ah ayaa isagana dilkiisa iyo dibindaabyadiisa laga caagganaa, iyadoo caadada Soomaalidu ahayd in, haddii dagaal dhaco, lala dagaallamo oo la iska celiyo ruuxii kula dagaallami kara oo keliya. Sidaa awgeed haddii beel la weeraro oo loogu tago nin buka oo xanuun la jiifa, in la dilo ama dhibaato kale la gaarsiiyaa waxay ahayd wax dhaqanka iyo dadnimada ka baxsan; waayo bukaanku wuxuu ku tirsanaa maatada ama dadka aan awoodda lahayn ee dilkoodu reebbanaa.

## *2. Culimada iyo Xerta*

Ragga Soomaaliyeed waxaa loo kala saari jirey: Wadaad iyo Waranle. Wadaadku wuxuu ahaa nin Ilaahay u go'ay oo ka caaggan waxyaabo badan oo ninka waranlaha ah u furnaa sida dilka iyo dhaca. Wadaaddada iyo ardada xerta ah ee diinta baranayaa waxay ahaayeen dad aan ku dhaqmin ficilo qabiil, hub qaadan, dagaalna ka qaybgelin. Sidaas darteed waxay door weyn ka qaadan jireen dhexdhexaadinta iyo nabadaynta qabaa'ilka markay colaadi dhacdo.

Taasi waxay keentay in wadaaddadu sahay la'aan meel kasta ku maraan, iyagoo huba in ay cid walba martigelin iyo soo-dhaweyn ka heli doonaan, sida ku cad gabayga Sayid Maxamed ee uu ku yiraahdo:

**Wadaadkii kitaabbo leh inaan, wan u qalaa weeye**
**Waylaalis[64] inaan meel dugsoon, ugu wadhaa weeye**
**Walanqihiyo[65] dhayada[66] inuu, walamsadaa weeye**

Waxaa wadaaddada loo haystey inay yihiin dad karaamo leh, isla markaana leh awood gaar ah oo Ilaahay siiyey, habaarkooda iyo ducadoodana markiiba wax laga arko. Sidaa darteed waxaa la aamminsanaa in qofkii wadaad dila, ama si kaleba u dhibaateeyaa, uu galay cuqubo iyo caaqilo tii ugu xumayd, ciqaabtiisuna soo degdegto, oo ifka ku hesho inta aan aakhiraba la gaarin.

Sida Soomaalidu godobta culimada iskaga ilaalin jirtey waxaa tusaale u ah sheekadan soo socota:

63. Saan-jiif (kaan-jiif) = qof bukaan ah oo muddo dheer xanuun la jiifey
64. Waylaalis = saan weyleed
65. Walanqaha = legga ama shafka idaha
66. Dhayada = legga dhinacyadiisa

*Col reer Hiiraan ah ayaa ku duuley beel agagaarka Caabudwaaq tiil, geel bayna ka soo qaadeen. Markay geelii meel dhexe marinayaan bay arkeen nin aan iyaga ka mid ahayn oo colka daba socda. Colkii wuu istaagey, markaasaa ninkiina istaagey; markii colkii dhaqaaqayna, wuu ka soo daba dhaqaaqay. Nin baa loo diray oo lagu yiri, "war ninka soo dil, malaa raacdadii buu ilaalo u yahay e". Ninkii la diray warankii buu soo rogtey waana kula dhaqaaqay. Ninkii colka daba socdey baa dib u cararay, markaasaa kii loo diray wuxuu arkay kitaab garabkiisa ka lulanaya. Ninkii dib ayuu ugu noqday colkiisii wuxuuna u sheegay in ninka loo diray uu wadaad ahaa oo kitaab garabka ugu jirey, sidaa darteedna uu iskaga soo laabtay.*

*Habeennimadii ayaa wadaadkii dul yimid colkii oo meel ku hilbo-qalanaya. Wuxuu yiri, "Anigu wadaad baan ahay, geelan aad soo dhacdeenna wax baan ku leeyahay. Waxaan idinka codsanayaa inta aan ku leeyahay inaad ii celisaan". Wadahadal kadib, kitaabkiisii baa lagu dhaariyey inuu geela inta uu leeyahay oo keliya ka soocdo, sidii buuna yeelay. Halkaasaana wadaadkii, oo Sheekh Axmed la dhihi jirey, geeliisii dib uga kaxaystay.*

## *3. Maganta*

Ninka reer-abtigiis ama xididkiis la deggan, ama dan kaleba meel tolkiis lagaga badan yahay u jooga, haddii qolada uu ka dhashay iyo qolada uu la deggan yahay dagaal dhex maro, wuxuu ahaan jirey magan, isagoo magantaas u ah guud ahaan qabiilka uu la joogo, gaar ahaanna koox ama qof ka mid ah. Waxaa kaloo dhici jirtey in laba qabiil oo is dilaya, dad midkood ama labadaba ka tirsan ay magan-galaan qabiil saddexaad oo isagu dagaalka dhexdhexaad ka ah. Waxaa intaas soo raaci jirey nin dagaal lagu qabtay oo colka qabtay nin ka mid ah ama la qolo ah magan-galay. Si kastaba ha ahaatee, maganta cidda ay u gashaana ma dili jirin; haddii cid kale kala hoos baxdo oo dishana, waxay ahaan jirtey arrin xadgudub weyn iyo xumayn ku ah cidda maganta loo yahay oo ay dagaal iyo dhiig daata ka xigi jirtey. Ninka magantiisa la laayey waxay uga dhignayd in isaga la diley. Xumaanta arrintaasi leedahay isagoo tilmaaamaya waa kii Cabdilaahi Hinnig lahaa:

**Inkastoo walaalkaa la miro, waad magdhabataaye**
**Manno[67] kaleba waa loo samraa, way ku soo mariye**
**Ninkii maganta kaa diley sidii, mawdka kuu yimide**
**Haddii seeddigood oo mucsura[68], maalkii laga qaaday**
**Maryo dhiig leh iyo baw ekaa, magacay reebaane**

Waana habkaas magan-galka kan Soomaalidu sida xoogga leh ugu adag tahay. Ninka dhaafaa waa nin godob tii ugu xumayd galay. Sida ay Soomaalidu mabda'a magannimada ugu adag tahayna waxaa inoo muujinaysa sheekadan yar oo beri hore ka dhacday aagga Diri-Dhabe:

*Waxaa la yiri nin buu siciisii dibi dhalay, waxaanu doonay inuu ka sidko. Dibigii yaraa ayaa nin aroos ahaa gurigiisii galay. Ninkii dibiga yar lahaa oo mindidii uu ku gawrici lahaa wata ayaa aqalkii ka soo daba galay. Ninkii arooska ahaa ayaa ninkii mindida sitey ku yiri: "Waar sidee baad oran dibiga yar?" "Waan gawrici," ayuu ninkii lahaa ugu*

67. Manno = hibo; abaal; halkan wuxuu ula jeedaa wax laguu geysto
68. Mucsur = sabool; qof dhaqaale ahaan aad u liita

*jawaabey. Waxa uu ku celiyey: "Waar ma dibiga aniga i soo magansaday ayaad leedahay waan gawrici?" iyo "Waar ma xoolahaygaad iiga soo jeeddaa?" baa la isu celiyey. Arrintiina qir iyo qir bay noqotay. Halkii bayna labadii nin isku dileen oo midkood qudh-dha lagaga jaray. Intaas ka-dib ayaa xaalkii wuxuu noqday "guutooy, guuto wareen" oo waa la isku rogmadey, reerkii dhammaa ee halkaas degganaana wax naf lihi kama harin.*

Dadka maganta ah waxaa ugu sii mudnaa xididka oo si gaar ah la iskaga ilaalin jirey godobtiisa. Sheeko ku saabsan xididka baa waxay leedahay:

*Mar qiyaastii laga joogo 160 sano ayaa dagaal dhex maray laba beelood oo reer Galguduud ah. Maalin labada qolo mid ka mid ah laga diley dhawr nin-door ayaa wiilal ciil iyo caro la wisiisiyey waxay soo qabqabteen dhawr nin oo qoladii kale ah, markaasna inan-la-yaalnimo ula degganaa, si loo dilo. Waxay keeneen meel colkoodii ku hilba- qalanayey. Raggaas la soo qabqabtay waxaa ka mid ahaa nin caan ah oo la oran jirey Kooshin Ugaas. Markii colkii loo keenay buu codsaday inuu hadlo inta aan la dilin, wuxuuna yiri: "Haddii nala dilo kolley waa naloo aari doonaa, dagaal kadibna waa la heshiin doonaa oo nabad ayaa dhici doonta, ee ninka gabadhiisu guur beeli doontow haddaba ka fiirso waxa iman doona". Colkii shirsanaa markii ay ka shawreen hadalkaas, waxay isku raaceen in la sii daayo ragga inan-la-yaalka ah ee wax-ma-garadku soo qabqabteen, lana xaal-mariyo. Dagaalkii labada beelood u dhexeeyey sidaasuu ku joogsadey, sababtoo ah ergo Kooshin Ugaas horkacayo ayaa u kala dab-qaadday oo nabadayntooda ka shaqaysay.*

Waxaa kaloo mararka qaar dhici jirtey in reero tiro yar oo hayb gaar ah ka tirsan ay la degaan qolo ka tiro badan, taasoo markaas qolada badan waajib kaga dhigi jirtey inay difaacdo reerahaas la yaal haddii weerar meel kale kaga yimaaddo, iyadoo reerahaasi ay magan u ahaan jireen beesha weyn ee ay la socdaan.

## *4. Ergada*

Ergo waxa la oran jirey guddi dad wax-garad ah ka kooban, kuwaas oo isu xil-saaray inay nabad ka dhex raadiyaan laba qolo oo dagaallamaya. Xubnaha ergadu waxay noqon kareen kuwo ka tirsan mid ka mid ah labada dhinac ee is dilaya, labada qoloba, ama qolooyin kale oo aan dagaalka lug ku lahayn.

Haddaba, waxaa Soomaalida xeerkeedu ahaa in aan la taaban ergo nabad-doon ah, ha ahaato marka ay qabaa'ilka kale sii dhex marayso ama inta ay dhex joogto qabiilka ay u socotey. Iska daa dil loo geysto e, waxay xeerka iyo gobannimaduba dhigayeen in ergada si fiican loo soo dhoweeyo oo la sooro xitaa marka la rabo in nabadda ay wadaan lagu gacan-sayro. Inta Soomaalida taarikhdeeda laga hayo, marar dhif ah baa la garanayaa oo dad ergo ah dil loo geystey, marka ay dhacdana waxay ahaan jirtey mid warkeedu bari iyo galbeedba ka dhaco, fac walibana faca ku xiga uga sheekeeyo, dadka oo dhanna fajiciso ku noqota. Dareenka la-yaabka ee dhacdadaas oo kale ka dhasha waxaan ka arki karnaa tuducyadan gabayga ah:

**Teer iyo Deryaaliyo tan iyo, duuddii Nebi Aadan**
**Ergo dadabta lagu gawracaa, dunida waw kow e.**

Maxamuud-Daallin

Waxaa xeer ahaan jirtey in haddii, ergada oo dhan iska daaye, mid ka mid ah la dilo ay ka dhigan tahay in ergadii oo dhan la laayey, waxayna ahayd in ergada oo dhan magteedii la bixiyo.

*Beri baa colaadi dhex martay laba reer oo Waqooyiga Bari ee Soomaaliya dega. Dagaal dheer kadib baa mid ka mid ihi ergo shan iyo labaatan nin ka kooban u soo diray kii kale si ay nabad uga raadiyaan. Nasiib darro, nin ergadii ka mid ah iyo nin qoladii loo socodey ah baa muran dhex maray. Ninkii ergada ka tirsanaa ayaa dhaawac xumi gaarey. Qabiilkii ergadu dhex joogtey waxay is tuseen in haddii ninkaasi dhinto laga soo qaadi doono shan iyo labaatankii nin oo la laayey. Sidaa awgeed, waxay ku tashadeen in haddii ninkaasi dhinto ay inta kalena raaciyaan, illeyn mar walba dembigii way qabaane. Ninkii waa dhintay. Sidaas darteedna ergada inteedii kale ayaa lagu fuliyey dilkii lagu tashaday. Waxaa ka baxsaday nin keliya, oo u galay reer abtigiis iyana ay bixiyeen loona mari waayey. Ninkii ayaa qoladiisii u geeyey warkii dhiillada lahaa. Nin gabayaa ah oo Aw Muuse la oran jirey baa arrintaas ergada la laayey ka tiriyey gabay ma-hadho ah oo la yiraahdo "DARBADAALEY". Tixdaas oo gubaabo ahayd, waxay keentay in colaaddii dib u soo cusboonaato ayna gaarto heer aan kala-har lahayn. Muddo dheer baa dagaalkii arrintaas ka dhashay socdey, dad iyo duunyana waa lagu rogmadey. Sheekadaas ergada la laayey waxay noqotay mid geyiga Soomaaliyeed oo dhan ku baahda, cid kastoo maqashana argagax iyo yaab ku ridda.*

Soomaalidu waxay oraah u lahayd:

**Ergo waa aan wada hadallo; aan wada hadallana waa aan heshiinno.**

Ergada nabad-raadiska ah ee qolo u dirto qolada kale ee colaaddu dhex taal waxaa meelaha qaar looga yaqaan "galliin", waxaana la yiraahdaa:

**Galliin la diidaa gadadac dambow leeyahay**

Haddii laba qolo is disho oo ay middood tan kale ergo maslaxo-doon ah u dirto (ama u galliinto), waxaa waajib ahayd in qolada loo gallimey ay waanwaanta oggolaato. Haddiise ay diiddo, gardarrada oo dhan iyadaa la saari jirey; qolada ka soo hor jeeddana waxaa u furnayd inay gardarradaas iska caabbido. Tusaale ahaan, waxaa la wariyey in.....

*....laba jilib oo ka tirsan beel gobolka Shabeellaha Dhexe degta ay diriri dhex martay. Mid ka mid ah ayaa kii kale u galliimey. Waa la soo diidey. Saddex ergo markii la diray, saddexdiibana la soo diidey ayaa nin la dhihi jirey Haruur Dabajaaw wuxuu la baxay sagaashan iyo sagaal igaar oo hubaysan. Siduu u sii wadey, markuu u dhow yahay meel qoladii kale ku shirsan tahay, ayuu colkiisii ku yiri: "Nin walowba waxaad fiirisaa labadaada suul-lugeed". Siduu iyagoo foorora u sii wadey, ayuu shirkii bartamaha u joojiyey. Markaasuu yiri: "Madaxa kor u qaada, waxaad fali lahaydeenna fala!" Meeshaas waxaa ka dhacay dagaal lagu hoobtay, waxayna arrintii ku dambeysey in qoladii markii hore ergada diiddey ay iyadii ergo nabaddoon ah soo dirsato, lana aqbalo, oo halkaas lagu heshiiyo.*

*Beri dambe ayaa Haruur Dabajaaw niman jifadiisa ahi ku yiraahdeen, "Ninkii Aqab Duco weerar ka qaaday ee Cagasacab geeyey, Haruur Dabajaaw tala-xume!" Wuxuu ku jawaabey, "Ha lagu bato uma geyne, ha laysku bartaan u geeyey!"*

## *5. Hoggaamiye Dhaqameed (Isin)*

Bulshada Soomaaliyeed waxay ku dhisnayd nidaamka tol tolka, reer walbana waxaa madax u ahaa hoggaamiye-dhaqameed, kaasoo beeshu wadajir u caleema-saari jirtey, taladiisana la tix-gelin jirey. Inkastoo jagadaasi sida badan dhaxaltooyo ahayd, haddana qofka xilkaas qabanaya waxaa loo fili jirey xilkasnimo, dhulqaad, deeq, asluub, haybad iyo karaamo diineed. Ninka isinka ahi wuxuu ahaa nin had iyo jeer danta guud ka taliya, nabadda u dadaala, colaaddana ka hor taga. Sidaa darteed, hoggaamiyaha dhaqameed (suldaan, boqor, wabar, imaam, garaad, ugaas, iwm.) wuxuu ka mid ahaan jirey dadka biri-ma-geydada ah ee dilkooda iyo ihaanadoodaba sida aadka ah la isaga reebi jirey. Murti Soomaaliyeed baa waxay tiraahda:

> **Saddexda duubka leh lama dilo** (gobta ama madaxda, culimada iyo haweenka)

Hoggaamiyeyaashaas xukunkoodu wuxuu inta badan ahaa mid ku dhisan talo iyo tusaale iyo tolka oo ay la shawraan, isu jiidaan, dhexdhexaadnimana ku dhaqaan; mase ahayn mid dirqis iyo amar-ku-taaglayn ku salaysan, taasoo uu diidayey dabciga madax-bannaani iyo sinnaan jacaylka ee qofka Soomaaliyeed ku abuurani. Haddii hoggaamiyuhu habkaas wada-tashiga iyo tol-isku-wadka ku xadgudbo, waxaa suuragal ahayd in duubka laga xayuubiyo ama kalsoonida lagala noqdo sidii dhacday markii...

*...Ugaas Xaashi oo u duubnaa beel Doollo iyo Hawd degta lagu dhaliilay inuu si xun u isticmaalay xilkii uu tolka u hayey, kuna dhaqmay eex, qaraaba-kiil iyo amar-ku-taaglayn. Arrintaasi waxay ka caraysiisey in badan oo ka mid ah dadkii uu ugaaska u ahaa, waxaana loo ballamay madal[69] lagula garnaqsado, sidii laga yeeli lahaana lagu go'aansado. Iyadoo tixda suugaaneed ay weligeed ka war dheerayd tiraabta, waxaa raggii goobtaas ugaaska kaga dacwiyey doodahoodii weli laga sii xasuusan yahay kuwii ay jeediyeen ilaa toddoba abwaan oo gabayadii iyo geeraarradii ay geedkaas ka tiriyeen kaalinta ugu weyn ka qaateen go'aankii ay Ugaas Xaashi talada kaga goosteen qaybo badan oo tolkiis ka mid ihi. Tixahaas waxaa ugu sii caansan gabay uu tiriyey Saahid Qammaan, ayna ka mid ahaayeen beydadkani:*

**Hadday muruqa geeduhu go'aan, milayga[70] jiilaalka**
**Mahwiga[71] ceel haddii loo kacoo, maalku ku arooro**
**Mataan[72] waa qaybsan jirey tolkii, midho wadaagaaye**
**Maggowsiin[73] haddaan layga siin, maax la dhuranaayo**

69. Madal = meel lagu ballamay; shir
70. Milayga = xilliga; waqtiga
71. Mahwiga = ceel aan biyihiisu go'in oo had iyo jeer dad iyo xoolo badani isugu yimaaddaan
72. Mataan = ceel biyo yar oo aan dad iyo xoolo badan ku fillayn
73. Maggowsiin = ereygu wuxuu ka yimid maggaabo' oo ah cantuugo ama afka muggiis

**Oon malab rag kale loo shushubi, wax uga miileeyo[74]**
**Oon meesha taagnahay anoon, murudna[75] leefaynin**
**Inaan maydhax[76] aan igu xidhnayn, maylimmo[77] u qaato**

**Oon weliba mood[78] iyo salaan, ula maleegnaado[79]**
**Saddex magac Allee xaajadaa, layma maransiiyo**
**Masow[80] aabbahay iyo halaan, Magan ka soo gaadhey**
**Rag waxaan ku maamuli aqaan, ama ku maamuusi**
**Masa[81] inaanu nahay ay tollimo, meerto[82] noo tahaye**
**Aan weliba kaga miil caddahay, miidhse[83] diiddaniye**
**Masallaha ninkaan ii dhigayn, midig ma saaraayo**
**Ninkii aniga iga maarmi kara, uma muraad yeesho**
**Muska Ina Afey galo arlada, kama miciin moodo.**
**Sidii koran xiniinyaha la mudey, uma mareeg qaato**

Waxaa iyagana taariikhda Soomaalidu xusaysaa hoggaamiyeyaal dadkoodii kula kacay xadgudub iyo jawrfal oo markaas ku kallifey in iyagiina laga cad-goosto oo birta laga aslo. Madaxdaas dhaqameed ee dhegta dhiigga loo daray waxaa ka mid ahaa Imaam Shafeeca-laawe oo sida la weriyey...

> *...hoggaamiye-dhaqameed ka ahaa degaanka Shabeellaha Dhexe muddo haatan laga joogo ilaa laba boqol oo sano. Sida magaciisaba ka muuqata, Imaam Shafeeca-laawe wuxuu ahaa nin arxan daran, dadkiisana cadaadis iyo waran caaradiis ku dhaqa. Imaam Shafeeca-laawe oo aan weligiis hadal lagu celin ayaa maalin maalmaha ka mid ah nin si bareer ah naqdi iyo dhaliil ugu jeediyey. Imaamkii aad buu u carooday, waxaanu amar ku bixiyey, si dadka kale ugu cibro qaato, in ninkaas meel fagaare ah lagu deldelo; sidii baana la yeelay. Ninka dhintay walaalkiis, oo aad uga xanuunsaday gardarrada lagu diley, ayaa intuu gadoodey Imaam Shafeeca-laawe waran wadnaha ka dusiyey. Halkaasaa Imaamkii iyo ninkii uu deldeley isku mar ku god-galeen.*

Sidaas oo kale ayaa Imaam Ciise oo ahaa imaamkii ugu dambeeyey boqortooyadii Gareen iyo Boqor Maxamuud Yuusuf oo hoggaamiye ka ahaa degaanka Bari loo diley kadib markii laga tirsaday xadgudub iyo dulmi.

Marka laga reebo xaaladahaas tirada yar, hoggaamiyeyaal-dhaqameedku waxay mar walba mudnaayeen xurmo iyo qadderin, dilka iyo meel-ka-dhacana looma quudhi jirin.

---

74. Miileeyo = qaybiyo
75. Murud = caanaha ama subagga farta soo raaca marka haweenku weelka tirtirayaan
76. Maydhax = waa astaanta boqornimada ama madaxnimada sida taajka
77. Maylimmo = warmo
78. Mood = noolow; jir
79. Maleegnaado = heegan ahaado; had iyo jeer la taagnaado
80. Masow = nin mudan oo hormuud ah; geesi
81. Masa = isku mid; kuwo siman
82. Meerto = wareegto; marba dhinac dhinaca kale u galo
83. Miidh = kala-sooc; kala-saarid

## *6. Martida*

Waxay kaloo Soomaalidu aad u tixgelin jirtey dhaqanka martigelinta. Qofka martida ahi wuxuu ahaa magan; magantuna waxay ahayd marti. Haddii ruux cadowga ka tirsan dagaal lagu qabto, oo loo hayo si dad loogu furto ama dan kaleba, waxaa loola dhaqmi jirey sida qof marti ah. Cunto, dhar, gogol iyo daryeel caafimaadba waa la siin jirey. Ninku, colaad kastoo idinka dhexaysa wuxuu ahaa lama-taabtaan inta uu martida kuu yahay; marti-soorkuna wuxuu ka mid ahaa astaamaha gobannimada ee qofka lagu ammaano inta uu nool yahay, marka uu dhinto kadibna lagu xusuusto. Gabayaaga la oran jirey Cali Jaamac Haabiil, oo tix baroordiiq ah ka tirinayey nin dhintay geeridiis, wuxuu yiri:

**Geb hadday martidu soo tidhaa, goob uu nala joogo**
**Godka-lagu-janneeyow hadduu, gaas dhan la carraabo**
**Gasiinkii[84] uu soo dhigay haddaad, gal[85] iyo daad mooddo**
**Bakhayl baa gamiima[86] e markuu, gaadhka ka qoslaayo[87]**
**Godolkuu[88] ku haasaawin jirey, gocanayaa[89] mooyi**

## *7. Safarka*

Inkastoo colaadi jirto, marka ay baahiyi timaaddo waa la is dhex mari jirey. Ninka socdaalka ah ee daw-ku-joogga ah iyo safarka uu wataaba waxay ahaayeen kuwo ay waxyeelladu ka reebban tahay, haddii safarkiisu yahay mid aan xiriir la lahayn colaadda taagan. Haddii qofkaa socdaalka ah ama safarka uu wato dhibaato loo geystana waxay ahaan jirtey arrin la isku dhaleeceeyo, ceebna laga dhaxlo. Cali Jaamac Haabiil, oo ka mid ahaa ragga ay Sayid Maxamed Cabdille Xasan iska soo horjeedeen, wuxu yiri isagoo Sayidka cambaaraynaya:

**Safar waa la tabantaabin jirey, lama tayiisayne[90]**
**Isna turuqyaduun[91] buu jaraa, timirta cuurtaaye[92]**
**Ma talyaanigaasaa mahdiya, tanina waa yaabe**

## *8. Hub-Ma-Leytida iyo Dadka aan Dagaalka ku Jirin*

Dadka qabaa'ilka dagaallamaya dhex deggan, aanse ka mid ahayn dagaalkana ku jirin, xididnimo ha ula degganaadeen ama magan ha u ahaadeene, iyaga iyo xoolahooda midna lama taaban jirin. Sidoo kale, ninka labada qolo ee dagaallamaya ka tirsan, aanse dagaalka ku jirin hubna sidan, iyo ninka war-ma-qabtada ah ee aan ogeyn in dagaalba dhacay iyagana

84. Gasiin = cunto
85. Gal = meel godan oo biyo galaan; balli; war
86. Gamiima = gunuunuca oo jirka is geliya
87. Gaadhka ka qoslaayo = dhoolla-caddaynayo
88. Godol = halkan waa sheeko
89. Gocanayaa = xasuusanayaa; tebeyaa
90. Tayiisayne = dibindaabyaynayn; dhibaataynayn
91. Turuqyada = muruqyada
92. Cuurtaa = si xun u dhergaa

Soomaalidu, guud ahaan, dilkooda way ka caagganayd, inkastoo ay mar mar dhici jirtey in la yiraahdo reer hebel aan war-ma-qabtada ku galno, ama nin aan waxba geysan loo dilo dakano[93] cid ay isku qolo yihiin gashay. Sheeko tilmaamaysa sida loola dhaqmi jirey dadka aan hubka sidan xilliga dagaallada baa waxay leedahay:

*Beri baa ciidan uu soo diray boqor Menilik oo seefa sidan jirey ay duullaan ku soo qaadeen degmo ka tirsan Galbeedka dhulka Soomaaliyeed. Waxaa seefaha u dheeraan jirey warmo wada bir ah oo la oran jirey waran Xabashi iyo gaashaan isna bir ah. Waxay doonayeen "gibir" ama cashuur qasab ah, oo ay rabeen inay dadka xoog kaga qaadaan.*

*Hase ahaatee, ciidankii duullaanka ahaa dagaal baa lagala hor tegey, waana la jebiyey. Intii dagaallamaysey mooyaane, waxaa jirey rag kale oo ciidankaas ula socdey inay madaxda ciidanka cuntada u kariyaan, iyo inay adeegyo kale u qabtaan. Kuwaas markii la qabtay ayaa nin Cabdulle Caaggane la oran jirey ku dhaartay in aan la laynin. Maxaa yeelay, wuxuu yiri: "Inalama dagaallamayn oo raggaasi hub-ma-leyti bay ahaayeen." Raggii caynkaas ahaa muddo ayaa la hayey oo la quudinayey, dharkii dadku xiran jirey oo go' iyo gundhati[94] ahaa baa loo wada xiray, dadkii baanay ka mid noqdeen.*

*Muddo kadib ayaa dawladdii Itoobiya farriin loogu diray in raggii taakuleyntu nool yihiin oo la hayo, dawladdiina farriin bay soo celisey ay ku leedahay: "Raggii ha naloo keeno, madax-furashana ha nalaga soo doono. Sidii baa la yeelay oo raggiina waa la geeyey, madax-furashadiina waa la qaatay. Boqorkii Menilik ayaa markaas yiri: "Dadka sidaas yeelay waa dad gob ah oo xilkas ah, ee hadda kadib yaan duullimaad loogu noqonnin." Sidaas bay duullaammadii gibir-doonka ahaa dhulkaas kaga joogsadeen.*

Haddii dagaal dhaco, dadka aan labada qolo ee diriraysa midna ka tirsanayn, dagaalkana dhexdhexaad ka ah, waxaa lagu dadaali jirey inaanu dagaalku gaarin ee uu ku koobnaado labada dhinac ee is haya oo keliya. Sheeko arrintan ku saabsan baa waxaa ku soo arooray in...

*...dagaal dhex maray laba qaybood oo ka tirsan beel degaankeedu yahay gobolka Shabeellaha Dhexe. Markay colaaddii xumaatay, ayna labadii qolo kala qaxeen, waxaa soo baxay dhul u dhexeeya oo aan midkoodna degi karin cabsi darteed. Dhulkaasina wuxuu noqday meesha labada col ilaaladoodu iska raad-goobto. Meeshii caynkaas ahayd, oo biyo iyo baad aan muddo la daaqin lahayd, ayaa waxaa soo degey reero hayb kale ka tirsan, kuwaas oo naqa baxay ka faa'iidaysanaya, labada dhinac ee dagaalku u dhexeeyana aan midna cabsi ka qabin.*

*Meel Buuraas la yiraahdo oo aaggaas ka mid ah ayaa labadii reer ee herdanku ka dhexeeyey mid ka mid ahi kulan Alla-bari ku qabtay, waxaana ka soo qayb galay dad qoladii dhexdhexaadka ahayd ka tirsan. Isagoo muujinaya welwelka uu ka qabo in reerahaas col-moogga ah dhibaato ku soo gaarto jiiddaas colaadeed ee ay degeen, ayaa nin la oran jirey Warsame Ruug-Yare tix guurow ah ka tiriyey goobtii kulanka, wuxuuna yiri:*

---

93. Dakano = utun; godob; dhibaato cid loo geystey oo aan laga raalli gelin

94. Gundhati = maro la guntado

**Laba ragaa isu riintay[95]**
**Immin dhoweydna isku rafaadday**
**Haddeertanna waa is rabaane**
**Nimanyahow raalli ahaadoo**
**Rarada meel ku dhoweysta**
**Raadaa la goobi lahaaye**

*Taasi waxay keentay in reerkii dhexdhexaadka ahaa ka diga-rogto aaggii colaaddu ka taagnayd, sidaasna kaga nabad galo dhibaato si kamma' ah ku soo gaarta.*

## 9. Dhaawaca Dagaalka

In dhaawaca dagaalku ka mid ahaa kooxaha biri-ma-geydada ah iyo in kale waa arrin muran ka taagan yahay. Waxaase arrinta laga eegi karaa laba dhinac: (1) Haddii ninka dagaalyahanka ah goobta dirirta dhaawac ku gaadho, dabadeedna iyadoo dagaalkii socdo oo uusan dhinacna u dhicin nabar kale oo is raaciya la gaarsiiyo, waa arrin la fili karo inta badanna dhacda. Xaaladdaas oo kale marka lagu jiro, biri-ma-geydo ma jirto. (2) Haddiise iyadoo dagaalkii dhinac u batay ay qoladii gacanta sare yeelatay ugu timaaddo goobta dhaawac laga tegey oo taag iyo tamarba gabay, waxay u muuqataa in dhaawacu markaasi biri-ma-geydo yahay, waayo wuxuu la mid yahay, lana xeer noqonayaa, maatada aan is difaaci karin ee dilkeeda ceebta iyo cuqubada lagu mudan jirey.

Haddii aan u leexanno sida taariikh ahaan wax u dhici jireen, waxaa guud ahaan Soomaalida xeer u ahayd in dhaawaaca cadowga ee loogu yimaaddo goobta dagaalka aan la is raacin; ee inta la qaado, la daaweeyo oo la baanto; marka ay si fiican u bogsadaanna, la kala doorransiiyo in tolkood loo celiyo iyo in ay la joogayaan reerkii gacanta ku hayey. Marar badan bay dhici jirtey in ninkii sidaas oo kale loo dhaqaaleeyey uu doorto inuu la sii degganaado reerkii bixiyey, markaasoo inta gabar iyo guri iyo xoolo la siiyo uu noqon jirey nin inan-la-yaal ah oo gacalkiis la deggan.

Waxaase jirtey in dhaawaca sida laga yeelayaa ay ku xirnayd marba colaaddu heerka ay gaarsiisan tahay, iyo hadba qolada dhaawaca qabsashadiisa ku horraysaa sida ay ula dhaqanto, taas oo markaas labada qolo ee is haysa xeer gaar ah u noqon jirtey muddada dagaalkaasi socdo oo dhan. Haddii markaas qoladii gacan-qaadka ku horreysey ay laysay dhaawacii ay qabatay waxaa labada dhinac xeer u noqon jirtey in dhaawaca aan la bixin ee la dhaawac-tiro. Haddii ay colaaddu heer xun gaarto, oo rag maqaawiir ah oo aan laga samri karin la kala laayo, markaasna dhaawaca la arko lama badbaadin jirin ee isla meeshiisaa lagu dili jirey.

Xaaladahaas gaarka ah ka sokow, waxaa Soomaalidu u badnayd in dhaawaca la badbaadiyo oo la daryeelo sida aan ka arki karno sheekadan:

*Muddo haatan laga joogo boqol iyo konton sano ayaa col Gobolka Mudug ka soo duuley ay galeen reero Hiiraan deggan. Dagaal baa dhacay uu colkii soo duuley ku jabay. Halkiina waxay kaga tageen rag dhaawac ah oo uu ka mid ahaa nin magaciisa la oran jirey Liibaan Gaab. Maalmo ka-dib ayay afar nin oo walaalo ahi heleen ninkaasi oo geed ku jira. Markii ay warsadeen wuxuu ugu jawaabey:*

---

95. Riintay (reentay) = guuxdey, gooddidey; hanjabtey

*"Waad i aragtaan oo dhaawac baan ahay. Colkii dorraato idinku soo duuley baan ka mid ahaa; ee ama i dila ama wax i tara". Laba nin oo ka mid ah afartii waxay ku taliyeen in la dilo. Ninkii ugu weynaa baase taa gaashaanka u daruuray, oo waxa uu ku yiri: "La dili maayo ninkan ee aniga ha la ii dhaafo". Ninkiina waa uu qaaday, oo gurigiisii buu geeyey. Markii la dhaawiciyey lana baantay ee uu bogsadeyna waxa loo sheegay inuu iska tegi karo. Liibaan Gaab ma tegine, reerkii baantay ee badbaadiyey ayuu la degey. Ilaa maantana tafiirtiisii reerkii bixiyey ayay la deggan yihiin oo ay ka mid yihiin.*

Markaa, dhaawaca bixintiisu waxay door weyn ka qaadan jirtey soo-af-jaridda colaadda iyo daaweynta calool-xumada. Reerkii dhaawaca daryeelaa waxa uu ahaa mid dhinaca kale u muujiya niyad-sami, taas oo qolada kalena wanaagga ku soo dabbaali jirtey.
Sida maatada oo kale, godobta ka dhalata dhaawac la diley, iyadoo aan arrintaas xeer hore loo lahayn, waxay ahayd mid hibashadeedu raagto oo aan la iskaga harin, sida ay muujinayso sheekadan soo socotaa:

*Nin dhaawac ah ayaa u yeeray malaaq ciidan hoggaaminayey oo agtiisa soo maray. Malaaqii wuxuu doonay inuu dilo. Ninkii dhaawaca ahaa wuxuu yiri: "Ha i dilin inta aan saddex wax kaaga sheegayo: Marka hore waxaan kuugu yeeray inaad i badbaadiso oo aad i noolayso; marka labaad, haddii aad i dishid nin dhan ma dilaysid ee dhaawac kala dhantaalan baad dilaysaa, taasina waa kugu ceeb; tan saddexaad, xaaskaygii uur bay leedahay. Waxaa dhici karta inay wiil dhasho, kadibna wiilkaasi iiga kaa aargudo." Malaaqii ninkii sidaas kuma deyn ee wuu diley. Ninkii dhaawaca ahaa xaaskiisiina wiil bay ku ummushay uurkii. Beri dambe oo uu wiilkii weynaadey ayaa malaaqii habeen soo martiyey, isagoo is leh ku garan maayo. Wiilkii baa wuxuu yiri: "Aabbahay dagaalkii maalin hebla ayaa lagu diley markuu dhaawacmay kadib. Sidaas darteed magtiisii baan doonayaa oo kama samrin." Malaaqii baa wiilkii canaantay oo ku yiri: "Arrintaasi beri hore bay ahayd. Arrimo badan oo kale baa ka dambeeyey; kuwaas dambeba waa la illaawey, ee adiguna tan iska illow." Wiilkii waa kacay oo malaaqii wuu ka tegey, wax yar kadibna intuu ku soo laabtay ayuu diley. Haweenkii guryaha joogey oo barooranaya markay arkeen malaaqii oo la diley ayuu duleedka isa soo taagey oo yiri: "Ogaada, aniga oo ina hebel ah ayaa malaaqa diley ee cid kale yaan loo qabsan."*

# Ragga la qabto iyo caadada is-bixinta

Sida aan qaybta dhaawaca ku soo aragnay, haddii labada qabiil ee diriraysa "dhiig-mayr" ka dhexeeyo oo cadaawaddoodu meel xun gaarto, waa yarayd in nin dagaal lagu qabtay la bixiyo. Intase arrintu xarraga-dirir joogto, waxaa caadada Soomaalidu ahayd in aan la dilin nin dagaal lagu qabtay, ee durbadiiba la sii daayo si uu colkiisii ugu noqdo. Qabashada la qabtay oo keliya baa isaga iyo tolkiina dhaawac iyo dhabar-jab u ahayd, cadowga qabtay ee bixiyeyna guul iyo faan ugu filnayd. Waana yarayd in nin la qabtay oo la bixiyey uu qoladii bixisay dagaal dambe ugu noqdo, waayo marka la sii daynayo baa la abhin jirey iyadoo la leeyahay "Allahaa hadduu Alle yahay orod oo naga tag, dhiiggaagu waxba noo tari maayee, hana nagu soo noqon."

*Nin la oran jirey Xasan Samatar Khalaf oo muddo afar fac laga joogo gobolka Mudug ku noolaa ayaa duullaan ku soo saaray cido degganaa gobolka Galguduud. Colkiisii waa la jebiyey, isagiina weerarkii baa lagu qabtay. Waxaa la weydiiyey: "Maxaad noogu soo duushey? Ma dakanaannu kaa qabney?" Wuxuu ku jawaabey: "Maya, dakano igama aydin qabin ee waxaan maqlay niman kibrey baa halkaas deggan, markaasna waxaan doonay inaan idin kibir jebiyo, haatanna anigii bay ila rogmatey. Markaa,Sidii aad doontaan iigu taliya." Dabadeedna inta geenyadii uu ku joogey loo waraabiyey, isagiina la muuneeyey ayaa lagu yiri: "Soco, oo colkaagii raadso, hana nagu soo noqon."*

*Muddo gaaban kadib ayaa wiilkiisii oo Maxamed la oran jirey uu isla degmadii col ku soo saaray. Isagana colkiisii waa la jebiyey, weerarkii baana lagu qabtay. Dabadeedna meeshii aabbihii lagu sii daayey baa la keenay, waxaana lagu yiri: "Ma godob baan idinka qabnaa? Maxaad noogu soo duushey?" Wuxuu ku jawaabey: "Aabbahay baa dagaalkii hore ceebi ka raacday oo waxaan doonay inaan aabbahay ceebta ka mayro. Haddana anigii baad i haysaan ee sidaad doontaan iigu taliya." Dabadeed inta faraskii loo waraabiyey, isagiina la xurmeeyey baa lagu yiri: "Iska tag, oo mar dambe haddaad dagaal noogu soo noqotaan idin bixin mayno ee ogaada!"*

Xataa marka ay colaaddu fogaato waxay ahayd in ninka la qabto lagu soo simo abbaanduulaha colka iyo hoggaamiyeyaasha kale si ay iyagu u go'aamiyaan tallaabada ninkaas la soo qabtay laga qaadayo. Xaaladdaas oo kale ruuxeeda waxaa rag badan oo la qabtay ku badbaadi jireen nidaamka is-bixinta ee Soomaalidu caado u lahayd: Nin colka wax qabtay ka mid ah oo ninka la qabtay garanaya (ama abaal hore ha u hayo, ama meel uun qaraabo ha ka noqdeene) baa soo bixi jirey oo ku dhawaaqi jirey in hebel magantiisa yahay oo aan laga taaban karin. Si aan colkii u kala jabin oo isagii dhexdiisa iskaga dilin, waxaa ninkii la qabtay gacanta loo gelin jirey ninkii bixiyey, kaas oo uu marti ahaan ula joogi jirey ilaa inta degmadoodii lagaga celinayo.

*Qarnigii sagaal iyo tobnaad dhexdiisii ayaa col Galguduud ka soo duuley uu weerar ku soo qaaday degmo tiilley gobolka Hiiraan. Waxaa dagaalkii lagu qabtay nin la oran jirey Axmed Muuse oo ka tirsanaa colka soo duuley. Laba jilib oo reerkii lagu soo duuley ka tirsan baa isku qabtay in la dilo iyo in la daayo. Nimankii yiri ha la badbaadiyo bay toodii noqotay. Axmed iyo ninkii badbaadiyey baa intay isa soo raaceen yimid degmadii Axmed u dhashay. Markuu wax yar marti ahaan ula joogey,*

*baa Axmed ninkii bixiyey ugu abaalgudey faras iyo neefaf geel ah. Markuu faraska guddoonsiiyey, ee soo ambabixinayeyna, wuxuu mariyey tixdan gaaban:*

**Kufri baan abaalgudin haddii, kaalmo loo galo e**
**Kobtii Koora-Geys iyo Galgalad, waan kasahayaaye**
**Waxay kulantideennii ahayd, koban qaboobayne**
**Gorgorkii kelyaha goosan jirey, kicisay waagiiye**
**Ilma Kooshin waan kula jeclaa, inay ku kuunyaane[96]**
**Xamar sii kaxee haatanaa, kaalin[97] loo dhigaye**

Sidaas oo kale baa weligeed ninka dagaalka lagu bixiyaa abaal ugu hayn jirey ciddii bixisay, oo si kasta isugu deyi jirey inuu abaalkaas u gudo. Sheeko kale oo arrintaas ku saabsan waxay leedahay:

*Beri baa dagaal dhex maray laba beelood oo dega Woqooyiga Galbeed ee Soomaaliya. Colka soo duuley waxaa hoggaamiye u ahaa nin la oran jirey Rooble Af-Deeb oo ahaa dagaalyahan caan ah. Dagaalkii colkiisii ayaa lagaga gol-roonaaday. Rooble Af-Deeb faraskii baa ka jabay, markaasuu kaynta ku dhuuntay. Cir kaa dheer, dhul kaa dheer buu xaalkiisii ku dhacay. Sidaa darteed buu habeen madow soo dusey. Ninkii ciidanka kale abbaanduulaha u ahaa oo la oran jirey Rooble Cawl buu isu dhiibey. Rooble Cawlna intuu quudiyey ayuu faraskiisii siiyey si uu degaankoodii ugu noqdo.*

*Si uu dhacdadaasi isaga soo gudo, ayuu beri dambe Rooble Af-Deeb weerar kale soo abaabuley. Markanna wuu guuleystey. Wiil yar oo ilaa toban jir ah oo baydad[98] ah ayuu helay, markaasuu faraskiisa fankiisii dambe ku qaaday. Reerkiisii buu la tegey. Waa uu toydey[99]; waxaanu ogaadey inuu wiilku yahay ina Rooble Cawl, ninkii uu berigii u tegey ee ku yiri: "Ama i bixi ama igu baasho[100]" ee bixiyey. Carruurtiisii buu ku daray wiilkaas oo la oran jirey Iidle Rooble Cawl. Markuu labaatan jir gaadhey ayuu u guuriyey gabadh waanu ku xooleeyey. Markaasuu faraskiisii siiyey oo u diray aabbihiis, Rooble Cawl, oo inankiisii beri hore samir ka qaatay, si uu isugu sheego, uguna sheego in Rooble Af-Deeb uu gudey abaalkii loo galay. Ilaa maanta tafiirtii Iidle waxay ka tirsan tahay tafiirta Rooble Af-Deeb, waana walaalo magta wada bixiya.*

Xataa haddii uusan wax qaraabo ah ku lahayn colka qabtay, ninku hadduu yahay nin caan ah ama geesi la yaqaan ah ama gabayaa caan-baxay ah ama madax reereed ah, waxaa loo bixin jirey xurmayn iyo abaal-dhigasho, sida ka muuqata sheekadan soo socota:

*Geela Dayax-weerar la baxay oo ay lahayd beel Woqooyi Galbeed degta oo ay darawiishi qaadday, ayaa lala fogaadey. Nin darawiishta ka mid ahaa, oo laga yaabo inuu ahaa Sayid Maxamed Cabdille Xasan laftiisa, ayaa gabar ka doonay nin la oran jirey Udub-la-Aslay oo ahaa madax beeleed. Udub-la -Aslay baa yiri: "Geelasha darawiishtu soo qaadday baa godobtoodu fog tahay, oo weliba geelii Dayax-weerar*

96. Ku kuunyaan = ku xasdaan; sed dheeraad ah kuu filaan; dhinacaaga waxtar u soo eegaan
97. Kaalin = dar; weelka xoolaha lagu waraabiyo
98. Baydad = carar; firxad (firdhad)
99. Toydey = haybsaday; magaciisa iyo magaca aabbihiis weydiiyey
100. Baasho = baal igu gasho; ninku marku dagaal ku libaysto ama cadow dilo ayuu baal madaxa gashan jirey

*lagu soo qaaday ayaa godobtiisu ugu fog tahaye isaga yaradka ha la iga siiyo." Sidii baana loo yeelay. Beeshii geela lahayd, oo arrintaasi la qaraaraatey, baa weerar isu soo abaabushey. Duullimaad fog bay soo qaadeen. Geelashii reerkii Udub-la-Aslay ka dhashay ayaa toos loo abbaaray, waana la soo qaaday. Udub-la-Aslay lafahaantiisii ayaa dagaalkii lagu soo qabtay, waana la soo kaxaystay.*

*Hase yeeshee, min-weyntiisii baa ka hari weydey. Ninkeedii intii loo sii daayey ayaa weliba boqol halaadna geelii looga reebay; islaantiina konton kale ayaa loogu daray. Haddii uu Udub-la-Aslay warsaday nimankii sidaas yeelay sababta isaga loo sii daayey, ee weliba geela loo siiyey, waxay ugu jawaabeen: "Boqor milgo ayuu nagu leeyahay oo annagaa boqor leh. Way nala fool-xumaatay inaanu ku bixinno, oo adiga oo gorofka cayreed sita aad dib nooga noqotid." Sidaasaana heshiis iyo is-af-garad labadii beelood ku dhex maray.*

# Dagaalka iyo hantida dadka

Sidaan horeba u soo xusnay, hantida keliya ee xeerka Soomaalida reer-guuraaga ahi oggolaa in la kala qaado xilliga dagaalka, waxay ahayd geela iyo fardaha. Lo'da, ariga, dameeraha iyo awrka gurgurshaaga[101] ah midna lama boojin jirin; taasna ujeeddadeedu waxay ahayd in haweenka iyo gurboodka loo dhaafo wax ay ku noolaadaan, illeyn iyagu dagaal kuma jiraane. Taasi waxay ahayd caaqiibo-talin danta caamka ah lagu dhawrayo. Sidaas oo kale, hantida guud ee aan la kala xigin, loona wada baahan yahay, lama waxyeellayn jirin. Tusaale ahaan, in durrimaha[102] xooluhu daaqaan dab la gesho, ama ceelasha biyaha la aaso ama la sumeeyo waxay ahaayeen falal aad u reebban oo aan lagu kicin. Waxaa la oran jirey:

**Ceel nin baa qoda ee nin ma cabbo.**

**Ceel ninkii qoday wuxuu leeyahay magaciisa iyo maaxdiisa** (oo keliya)

In guryaha la galo xilliyada colaadda ama qalabka hoos yaalla la gurto baa iyana ahayd wax ka baxsan mabda'a gobannimo-dirirka ee Soomaalidu sida weyn u aamminsanayd, falkaas oo kalena wuxuu ahaa mid aan dheg-xumadiisu si fudud u harin sida aan ka arki karno sheekadan gaaban:

> *Qiyaastii 1930kii ayaa col degaanka Matabaan u dhashay ku duuley tuulada Maxaas. Colku dhiig-doon ma ahayn ee dhaqan-doon buu ahaa. Colkii oo aan weli wax xoolo ah gacanta ku dhigin baa sahaydii ka dhammaatay. Abbaanduulihii colka watey oo aan ka war qabin ayaa dhawr wiil oo gaajadii u adkaysan waayey waxay galeen guri, waxayna toorrey ku jeexeen tebbed (qumbe) oodkac (muqmad) iyo subag ka buuxaan, waana ka dhergeen. Abbaanduulihii markuu ogaadey dhaqan-xumada wiilashu ku kaceen, wuxuu colkii ku amray inay guryahoodii dib ugu laabtaan. Hase yeeshee, tallaabadaasi waxba kama beddelin magac-xumadii colkaasi raacday, waayo waxaa colkaas iyo duullaankiisiiba loo bixiyey, oo uu ku caan-baxay, magaca ah "Ey Aqal Galay".*

Waxaa intaas weheliyey iyadoo aan la oggolayn in guryaha dab la suro ama la dumiyo ama weelka iyo qalabka kale ee hoos yaalla la burburiyo. Beeraha in la gubo ama dhirta miraha leh la jaro iyaduna xaaraan bay ahayd. Waxaa kaloo reebbanayd in xoolaha ujeeddo la'aan loo laayo, iyo in neef dheddig ama neef dhalaya la gawraco iyadoo aan baahiyi kallifin. Qofka taas yeelaana wuxuu ahaa qof cuqubo weyn galay.

Dhinaca degaanka xoolo-iyo-beeraleyda ee labada webi u dhexeeya, in hubka iyo qalabka kale ee dagaalka la kala furto mooyee, waxaa dhaqanka dagaalka ka baxsanayd in wax hanti ah oo kale, haba yaraate, la kala qaado.

Arrimahaas oo dhammi waxay ka soo jeedeen aragti ah in dagaalka lagu koobo ragga dagaallamaya oo keliya, mujtamaca iyo waxyaalaha noloshiisa asaaska u ahna aan la tirtirin ee fuf[103] laga reebo, taas oo salka ku haysa maahmaahdii Soomaaliyeed ee ahayd:

101. Gurgurshaa = awrka hayinka ah ee guriga, carruurta iyo maqasha lagu qaado
102. Durrimaha = kobaha
103. Fuf = biqil, shinni

**Gobi geed ma goyso; hadday goysana gunta kuma sinto.**

Waxyaalaha aan soo sheegnay waxa ugu qiimo yar weelka guryaha hoos yaalla. Isagana, sida Soomaalidu ugu adkayd ilaalintiisa, waxaynu ka arki karnaa sheekadan:

*Nin baa nin ku dhagaroobey*[104]*. Sidii caadada ahayd, xabaalo-qodkiisii ayaa la keenay, axankiisiina waa la bixiyey. Wixii haray ee la isugu yimaaddaaba waa magtii iyo sidii loo marin lahaa geela.*

*Iyada oo sidaas la isku af-gartay, ayaa nin ninka la diley ay is xigeen oo la oran jirey Af-Gaab uu col la baxay oo reerkii ninka diley uu ku duuley. Meeshii oo raggii iyo geeliiba ka maqan yihiin buu tegey oo dumar iyo carruur keliya uun buu kula kulmay. Ciil wisiisigii, qarid (qarbed)*[105] *oo ah weel-biyoodka ugu qiimaha iyo qaayahaba weyn degaankaasi ayuu waran isaga tafiyey oo uu dalooliyey.*

*Haddii geedkii la isugu yimid si magtii looga wada hadlo oo loo kala qaato, qoladii ninka laga dileyna gartoodii ay madasha keeneen, boqolkii ninkoodii dhintayna guddida u soo ban-dhigeen, ayaa waxa markiiba ka hor timid dacwad ku saabsan falkii xumaa ee Af-Gaab uu ku kacay. Maaxawdii (weelkii) uu burburiyeyna waxay cuntay oo loo tuuray konton halaad. Adigu isku celceliyoo aakhirataankii markii xisaabtii dhan walba la isaga min-guuriyey ee la isu wada geeyey, wax aan waxba ahayn ayaa dhiiggii ninkii la diley magtiisii ka noolaaday. Ciil-wisiisigii ayaa wiil ina-adeerkiis ahaa kula dhacay oo waran ka taagey isaga oo leh: "Waar, bal waxaas dhiiggii ninka naga bi'iyey daya!"*

*Halkaasi ayuu Af-Gaab ku naf waayey, tolkiina magtii ninkoodii dhintay ee la diley, iyaguna ku waayeen.*

Sidaasaanu weelku xagga dhaqanka Soomaalida ugu adag yahay. Waxaana la yiraahdaa ninkii weelka dadku ku nool yihiin wax yeelaa, weel keliya wax ma yeeline, qof keliyana wax uma geysane, reer dhan ayuu kula kacay dabar-goyn. Taasoo micnaheedu yahay, qofka reer weelkoodii noloshoodu ku xirnayd jejebiyey inay la mid tahay reerkii oo uu wada laayey dhammaantood.

104. Dhagaroobey = diley; dhagar ku galay

105. Qarid (qarbed) = weel biyood ka samaysan harag riyaad ama ugaadheed oo la magdiyey oo dadka xeebaha cimiladoodu kulushahay degaa u isticmaalaan biyo qaboojiye.

# Dagaalka iyo diinta Islaamka

Degaanka Soomaalidu wuxuu ka mid ahaa dhulalkii diinta Islaamku ugu soo hor gaartey, taariikhda Soomaalidana in badan oo ka mid ah baa la xiriirta difaaca iyo fidinta diinta. Haatanna dadka Soomaaliyeed waa dad wada Muslin ah ilaa xad qofku haddii uusan Muslin ahayn ay Soomaalinnimadiisu muran gasho. Waxaan shaki ku jirin in diinta Islaamku si weyn u saamaysay nolosha, dhaqanka iyo xeerarka dagaalka ee dadka Soomaaliyeed. Haddii aynu mid ka mid ah soo qaadanno, hababka Soomaalidu wixii dhib ah ee ama dhaawac ah ama dhimasho ah ku magtaa, waxay inta badan ku salaysnaayeen shareecada Islaamka. Sidaas si le'eg, arrimaha qoyska oo dhan sida guurka, furriinka iyo dhaxalka waxa loo cuskan jirey diinta Islaamka.Xeerarka biri-ma-geydada ee Soomaalidu ku dhaqmi jirteyna waxay inta badan waafaqsanaayeen amarrada diinta Islaamka ee ku saabsan dhaqanka dagaalka.

Markii diinta Islaamku ka soo if-baxday jasiiradda Carabta qarnigii toddobaad ee Miilaadiga ahaa waxay u timid Carabta oo, sida Soomaalidu tahay, qabiil qabiil u qaybsan isuna dila. Diinta Islaamku dadkaas way walaalaysay, ilaa xad, haybtii qabiilkana waxay ugu beddeshey hayb iyo ahaansho ku salaysan caqiidada Islaamka. Isla markaas, diintu waxay xaaraantimaysay wax dagaal ah, oo heer qofeed iyo heer kooxeedba ah, oo Muslimiinta dhexdeeda ka dhaca. Nebi Maxamed, nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, wuxuu yiri:

> "Haddii laba Muslin ahi iskala hor yimaaddaan seefahooda, kan wax dila iyo kan la dilaaba naartay ku sugnaanayaan."

Xataa marka jihaadka lagula jiro dadka diinta liddiga ku ah, waxa Alle iyo Rasuulkiisuba mu'miniinta fareen inay ku dhaqmaan akhlaaq sare oo muujinaysa sarraynta diinta ay wataan. Waxa Muslimiinta laga reebay inay dhaawac dilaan ama meyd jarjaraan. Waxaa loo diidey inay dumarka, carruurta, waayeelka iyo xerta gaalada ee cibaadada u go'day midna dilaan. Waxaa kaloo laga reebay inay geed-mirood gooyaan, ama beer gubaan, ama guri dumiyaan, ama neef xoolo ah oo aan baahiyi u geynin ay gawracaan.

In kastoo, sidaan sheegnay, dadka Soomaaliyeed ay gebi ahaanba rumaysan yihiin diinta Islaamka, misana, sida maantaba muuqata, haysashada diinta Islaamku ma ahayn mid Soomaalida ka reebta in ay reer reer isugu duulaan, isu dilaan oo isu dhacaan; taasoo noqon karta in caadifadda qabiilku weligeed Soomaalida kaga xoog badnayd caadifadda diineed, ceebta ifkuna kala weyneyd cadaabka aakhiro. Waxayba Soomaalidu hal-hays u leedahay:

**Rag ciil cadaab ka doorey.**

Sidaas oo ay tahay, Soomaalidu astaamaha muuqda ee diinta la xiriira waa xurmayn jireen. Tusaale ahaan, goobaha lagu cibaadeysto ee masaajiddada iyo mawlacyada ah, dugsiyada Qur'aanka, maqaamyada awliyada iwm. dagaal kastoo jira hub lalama geli jirin, dil iyo tacaddi kalena laguma dhex geysan jirin, qof magan-galayna inta lagala soo baxo lama dili jirin. Masaajid la dumiyo ama la bililiqaystaana waa mid aan maanta ka hor sheeko iyo shaahid toona lagu arag. Sidaas oo kale, haddii qof cadowga ka tirsan loo yimaaddo, oo intuu kitaab Qur'aan ah ama looxa lagu dhigo qabsado, dabadeed yiraahdo: "Kitaab Allow magantaa baan ku jiraa," lama dili jirin ee waa la dhaafi jirey.

Oraah muujinaysa qadderinta Soomaalidu masaajiddada u haysey baa sidan ahayd:

**Masaajidow minan Alla; lankii marwaayo ma qadaw**
oo la micne ah: **Masaajidow guri Ilaah; ninkii ku xurmeeyaa ma qadayo.**

# Qabiilka u gurmada dhaawaca

Marka laba qabiil ay colaadda ka dhexaysaa gaarto heer dhiig-mayr, oo qolana qolada kale dhaawaceeda bixin weydo, waxaa dhici jirtey in qabiil saddexaad oo dagaalka dhexdhexaad ka ah, degaankiisuna ku dhow yahay aaggaas dirirtu ka dhacayso, uu bini-aadannimo darteed isugu xil-saaro badbaadinta dhaawaca labada dhinac ee is dilaya. Qabiilkaasi wuxuu u gurman jirey dhaawaca oo ka daad-gurayn jirey goobaha laysku haleelay, daaweyn iyo daryeel kalena u fidin jirey. Qabiilka hawshaas bini-aadminimo ku jira xubnihiisa labada qabiil ee dagaallamaya midna ma taaban jirin, waayo, shaqada ay hayaan waxay ahayd mid ay hor Ilaah u qabanayaan oo aanay ajar iyo abaal toona cid kaga sugayn, labada dhinac ee colaaddu dhex taallana dan u wada ah.

Marar badan culimada ayaa doorkaas isaga ah qaadan jirtey, iyagoo sidaas si la mid ah dhaawaca u daadgurayn jirey una daryeeli jirey, hantida la kala dhacana dhex u hayn jirey ilaa inta heshiis laga gaarayo.

Kaalinta qabiilkaas ama culimadaasi dagaalladii hore ka qaadan jireen waxaa dagaallada maanta ka qaata Ururka Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah, kaasoo qaabilsan daryeelka iyo badbaadinta iyo gacan qabashada dhammaan dadka dhibaatadu ka soo gaarto dagaallada.

# Hubka iyo falalka dagaalka ee reebbanaa

Iyadoo ka soo jeedda dhaqanka gobannima-dirirka ee Soomaalidu aad u qiimayn jirtey, waxaa jirey hub la oggolaa in loo adeegsado colaadda iyo mid isticmaalkiisu xaaraan ahaa. Qalabka adeegsigiisu bannaanaa waxaa ka mid ahaa waranka, seefta, gar-ma-qaataha[106], budka, toorreyda, warafka, fallaarta aan mariidka lahayn, iwm.. Dhinaca kale, waxaa isticmaalkoodu reebbanaa jeedalka (ama shaabuugga), sunta, fallaarta mariidka leh, gudinta, faaska, mindida wax lagu qalo oo sidii xoolaha qof loogu gawraco, iwm.

Isla markaas falalka ay reebbanayd in qof lagula kaco waxaa ka mid ahaa in ciijin (ama cunaha oo la qabto) lagu dilo, nolol lagu aaso, la isir-caayo (qabiilkiisa la caayo), candhuuf lagu tufo, la kabeeyo, ama dhirbaaxo lala dhaco. Sidaasoo kale, waxaa dhaqanka ka baxsanayd in meydka la gubo, la jarjaro ama la qaawiyo.

Qofka jeedal, kab ama dhirbaaxo lala dhaco, ama la candhuufeeyo waxay uga dhignayd quursi iyo yasid loo geystey isaga iyo reerkiisaba, waxaana falalkaas oo kale ka dhalan jirey colaadaha kuwa ugu xun, waana tii gabayaagii Salaan Carrabey ka lahaa:

**Nin dhirbaaxo quudheed duugsadey, dhaqayadeed[107] maalye**
**Dhashaaday sugtaa xaajadaad, dhawrataa abide**

Waxaa la sheegay in dhulka Soomaalida qaarkiis, haddii siyaalaha xun xun ee aan soo sheegnay mid ka mid ah qof loo dilo ay guddida dhagartaas garteeda qaadaysaa geedka iman jirtey iyadoo hubkeedii u dhan yahay: waran, billaawe, gaashaan, iwm., inkastoo aan sida caadiga ah geedka garta loo oggolaan jirin in hub lala yimaaddo, sida laga arki karo oraahda ah:

**Gar iyo gaashaan geed ma wada tagaan**

Xaaladdan oo kalese, waxaa sidan loo yeeli jirey in la muujiyo arrinta caado-dhaafka[108] ah ee dhacday culayskeeda, taasoo keentay in si aad u adag loola dhaqmo reerkii falkaas foosha xun geystey oo aan iyagu geedka hub la iman karin.

Marka la xaqiijiyo in dhagartaasi dhacday iyo ciddii ka mas'uulka ahayd, waxaa xero laga dul oodan jirey reerkii dembigaas galay, lagamana dul tegi jirin ilaa ay soo tubaan magtii ninka oo ah boqol halaad oo maris[109] ah, kuwaas oo midda ugu da' yari afar jir tahay tan ugu da' weynina afar dhal tahay. Isla markaana waxaa lagu xukumi jirey inay bixiyaan ninka dhintay axankiisii iyo xoolo kale oo samirsiis ah iyo gabadh godob-reeb ah. Waxaa intaas u dheeraa inay qaabilaan kharashka guddidaas ku baxaya muddada ay arrintaas u fadhido oo dhan.

Haddii ay sidaas yeeli waayaan, weerar loo dhan yahay baa lagu qaadi jirey; iyadoo dagaalkaas wixii kaga luma ee naf iyo maalba ah aan mag-dhaw laga siin, wixii ay iyagu dilaanna mag qasab ah looga qaado.

106. Gar-ma-qaate = ul dheer oo labada caaraba loo fiiqay
107. Dhaqayadeed = cawaaqib xumadeeda
108. Caado-dhaaf = xeerkii iyo caadadii ka baxsan
109. Maris = siman; ama nooca ama da'da iskaga mid ah

# Heshiiska iyo nabadaynta

Waxaa jirta oraah Soomaaliyeed oo ah:

**Ol nebedaa ku damboyti**;

oo macnaheedu yahay:

**Colaad (kasta) nabad baa ka dambaysa**

Haddii laba qabiil dagaal dhex maro, waxyeellana kala gaarto (qur iyo qoon, dhiig iyo dhaqan mid kasta ha ahaatee) sida badan colaaddaasi, muddo kasta iyo heer kasta ha gaartee, waxay ahaan jirtey tii la isaga yimaaddo ee laga heeshiiyo.

Dad badan ayaa nabadda iyo islaaxa ka talin jirey, kuna dadaali jirey inay fidmadii kacda demiyaan, dadkana wanaag iyo heshiis dhex dhigaan; dadka qaarkiina (sida gabdhaha ugub) waxaa loo adeegsan jirey sidii laba reer oo dhiig ku dhex daatay dib loogu walaalayn lahaa. Haddaba dadka doorka muhiimka ah nabadaynta ka ciyaari jirey, annagoo mid mid u soo qaadanayna, waxay ahaayeen:

## *1. Isimmada ama Madaxda Dhaqameed ee Qabaa'ilka*

Soomaalidu waxay aamminsanayd in derejo oo dhan Ilaahay bixiyo. Sidaas darteed waxay u arki jireen madaxda beelaha sida garaaddada, boqorrada, ugaasyada, suldaannada, malaaqyada, imaamyada, wabarrada, iwm., inay yihiin dad amar Ilaahay ku haya xilka ay hayaan oo karaamaysan; habaarkoodu kaco, ducadoodana la aqbalo. Isimmadu, guud ahaan, awood ciidan uguma talin jirin beelaha ee waxay ku maamuli jireen wada-tashi iyo go'aanka qabiilku soo gaaro, oo haddii uu yahay mid san, ay u guddoomiyaan, uguna duceeyaan.

Ninka qabiil isin u ah way ka reebbanayd inuu colaad ku taliyo, col hoggaamiyo, booli la soo dhacay saami ka qaato ama sabab u noqdo dhibaato gaarta dad aan waxba galabsan. Nin boqor ah oo beri dhibaato ku soo gaartey fidmo uu markii hore abaabulkeeda iyo ololaheeda wax ku lahaa baa gabay digasho ah loo tiriyey oo la yiri:

**Boqorkii Islaam ihi hadduu, belo hor meermeero**
**Waagii bilkaadaba[110] hadduu, biro col soofeeyo**
**Sidii dibi badraanoo mid kale, baasha ka haleelay**
**Inuu badhida ceel ugu dhuftaa, bagihii weeyaane**

Sidaa darteed, marka belaayo dacayga la baxdo, ama oodda soo jabsato, waxaa gurman jirey oo nabadda u ololayn jirey guud ahaan ragga wax garadka ah ee xilkaska ah, gaar ahaanna ragga beelaha madaxda u ah ee hadalkooda la tixgelinayo, taladoodana loo soo joogsanayo; inta badanna dadaalkoodaas waa ku guuleysan jireen, oo waxaa la rumaysnaa haddii nin boqor ihi tolkiis dagaalka ka hor joogsado oo ka habaaro in ay ku jabayaan haddii ay ku gacma-sayraan.

---

110. Bilkaadaba = bidhaamaba; beryaba

## 2. *Gabayaaga*

Beesha reer guuraaga Soomaaliyeed ee aan qoraalka lahayn waxaa hadalku dhexdeeda ku lahaa qiimo aad u weyn, hadal af laga yiraahdana waxaa ugu mudnaa ka tix maanso ah (gabay, geeraar, iwm.) lagu sheego; kaasoo loogu dareemi ogaa, looguna xasuusan ogaa. Sidaa awgeed bulshada Soomaaliyeed tixgelin gaar ah bay siin jirtey, welina siisaa, gabayga iyo gabayaagaba.

Inkastoo gabayaagu marar badan hibadiisa u isticmaali jirey coolaad oogisteed iyo faan qabiil, waxaa jirtey marar kaloo badan oo uu u adeegsan jirey ka-hor-tagga aafo dagaal, waano iyo hoga-tus, iyo nabadaynta laba qolo oo colaadi dhex martay. Tusaale ahaan,

> *waxaa la weriyey in qarnigan labaatanaad bilowgiisii laba jilib oo ka tirsan qabiil Gobolka Togdheer dega colaadi dhex martay. Markii labadii ciidan dagaal isugu soo qalab qaateen, oo dadkii kale oo dhammi kala joojin kari waayey, ayaa gabayaa la oran jirey Salaan Carrabey intuu labadii col kala dhex joogsadey, mariyey geeraar u ku kala qaboojinayo, kaasoo ay ka mid ahaayeen cutubyada soo socdaa:*

**Maalintii Cumar Daahir**
**Isku gooyey ciyaartiyo**
**Nin Caloola-Cad joogey oo**
**Maygaag-ciidan war qaatay**
**Belaayuu curufkeediyo**
**Camalkeeda yaqaannoo**
**Waa cibaaro qabaaye**
**War tolow colka jooja!**

**Nin habeenno casheeyey**
**Caad yar aan har lahayn iyo**
**Ceeryaamaysugu toostoo**
**Inuu caafiyaddiisa**
**Cabbaar meel la fadhiisto**
**Caqligaanay gelayne**
**War tolow colka jooja!**

**Carrabkaan ku hadlaayana**
**Nin caleentii caddaatiyo**
**Caammadaan garanayn oo**
**Markay cuurar dhintaan ee**
**Cutub weyni idlaataa**
**Lays canaanan hadhowe**
**War tolow colka jooja!**

**Labadiinnatan cuuree**
**Isu coobba-ridaaya**[111]
**Cidna waysu xignaa**

---

111. coobba-rid = doobin; muujin astaan dagaal; dhoolla-tus

**Ciilna waysu qabnaa**
**Canlana waa is ogeyn**
**Haddii aad is cuntaanna**
**Idin caabudan maayee**
**Intii aan mid la ciidmaan**
**Kan kaleeto ku ciiriye**
**War tolow colka jooja!**

*In yar kadib markii uu geeraarkaasi tiriyey bay labadii col kala dareereen iyagoo waanadiisii wax ku qaatay.*

### *3. Culimada*

Iyadoo culimadu guud ahaan akhyaarta dadka ka tirsanayd, baa waxa u sii dheerayd tixgelin iyo hamrasho gaar ah oo ay ku heli jireen aqoonta ay u leeyihiin diinta Islaamka iyo xeerarka shareecada. Sidaas darteed, wadaaddadu qayb weyn bay ka qaadan jireen ka-hor-tagga iyo joojinta dagaallada. Tusaale ahaan, marka colaadi qaraxdo, wadaaddadu waxay soo qaadan jireen maryo cad cad oo Qur'aan ku yaallo iyo kutubta Qur'aanka, waxayna kala dhex joogsan jireen labada col iyagoo ugu baaqaya inay dagaalka joojiyaan, kuna cabsi-gelinaya in qoladii diidda ay habaari doonaan. Xurmada loo hayo darteed, marar badan bay culimadu dadaalkoodaas ku guulaysan jireen.

### *4. Dumarka*

Markay colaadi jirto, dumarku waxay ahaayeen cidda keliya ee xorriyad iyo cabsi la'aan ugu kala socon karta labada dhinac ee dagaalka isku haya. Sidaa awgeed, qolaba qolada kale waxay qabto iyo sida ay heshiis iyo nabad diyaar ugu tahay iyagaa laga ogaan jirey; farriimaha waanwaanta iyo dagaal-joojinta ku saabsanna iyagaa labada qolo u kala qaadi jirey. Sida la sheegayna Woqooyi Galbeedka shishe ee carriga Soomaalida waxaa dumarka, gaar ahaan kuwa dhalma-deyska ah, looga adeegsan jirey ergo ahaan.

Haweenku waxay, isla markaas, kaalin ka qaadan jireen bixinta iyo badbaadinta dagaalyahannada ama rag-doorka u dhashay reer ay qoyskooda colaadi dhex taallo. Badbaadintaasina waxay badanaa horseedi jirtey nabad iyo xiriir wanaagsan oo beddela colaaddii markii hore u dhexaysey labada beelood.

Waxaa intaas dheeraa: Marka laba qabiil oo is dishey la heshiisiiyo, ee naf iyo maal waxay kala qabeen loo kala guro, waxaa la is dhaafsan jirey gabdho ugub si heshiiskaas loo xoojiyo. Caadadaas waxaa ujeeddadeedu ahayd in gabdhahaasi reerka la siiyey u dhalaan wiilal u gala kaalintii ay ka baxeen raggii dagaalka kaga dhintay, iyo in labada qabiil ay sidaas ku yeeshaan xiriir gacalnimo iyo qaraabo si ay u adkaato in colaad dambe dhex marto. Waxay Soomaalidu ku maahmaahdaa, iyadoo caadadaas gabdho-is-weydaarsiga ula jeedda,

**Meeshii xinjiri ku daadato xab baa lagu bururiyaa.**

Sidaas bay haweenku kaalin muhiim ah ugu lahaayeen nabad-raadinta hore iyo heshiisiinta dambeba.

## *5. Bir-Tumayaasha*

Iyadoo arrintani tahay mid, inta aan ognahay, gaar u ah degaanka labada webi u dhexeeya, waxaa la sheegay in haddii qof ama koox ka tirsan dadka biraha tumaa ay kala dhex galaan laba qabiil oo is dilaysa, ama markaas isu soo hub qaatay, kana codsadaan inay dagaalka joojiyaan, in arrintaas degdeg loo yeeli jirey. Waxaa sidaas ugu wacnaa iyadoo bir-tumayaashu ahaayeen kuwa keliya ee hubka lagu dagaallamayo sameeya, lagana cabsan jirey inay ciddii dhexdhexaadintooda diidda ku soo rogaan cuna-qabatayn dhinaca hubka ah, oo markaas dagaalka lagaga adkaado.

## *Habka heshiisiinta*

Ugu dambaynta, dhinaca reer guuraaga, marka labadii qabiil ee colaaddu dhex martay odayaashooda laysugu keeno geedka ama golaha lagu heshiinayo, waxaa la isu tirin jirey ragga dhinac walba dagaalka kaga dhintay; qoladii dheeraad yeelatana, tirada dheeraadka ah magteedii baa la siin jirey. Haddii xoolo la kala dhacay intii colaaddu socoteyna, waa la isu celin jirey. Dabadeedna gabdho ugub baa la is dhaafsan jirey, halkaasaana nabad la isku dhaarsan jirey, laguna ducaysan jirey.

Dhinaca webiyada, labada qolo ee dirirta culimo iyo ashraaf iyo rag kale oo akhyaar ah baa dhex geli jirey. Marka ay heshiis oggolaadaan, ayaa inta midba sabeen (neef ido ah ama geel ah) laga qaado, kan kale lagu xiri jirey. Marka sabeenta loo geeyo qoladii lagu xirayey, baa la gawrici jirey.

Sabeen-xirka kadib ayaa guddidu arrinta laysku hayo dhex geli jirtey, qoladii qallooca waddeyna garta la saari jirey, xaal iyo xumaynna laga qaadi jirey. Markaas kadib ayaa dadka dhintay la isu tirin jirey. Haddii wax la is dheeraado, qabaa'ilka Digil waxay kala qaadan jireen sabeen iyo duug keliya; laakiin qabaa'ilka Mirifle mag (ama diyo) bay kala qaadan jireen.

Labada qabiil wakiilladooda ayaa markaas is gacan-qaadi jirey ama kitaab Qur'aan ah gacanta saari jirey, dhaarna isugu mari jirey inay heshiiska daacad ka yihiin. Waxaa heshiiska lagu soo xiri jirey iyadoo dhinac walba afar faataxo loo akhriyo, culimada iyo ashraaftuna meeshaas ka ducayso.

# Gebagebo

Qoraalkan aan isku soo dubba-ridney waxa aan ubucdiisa ku soo lafa-gurnay, inkastoo dagaallo dhexmari jireen qabaa'ilka Soomaaliyeed had iyo jeer, sida aanu badanaa ku-talax-tag u dhici jirin. Dagaalku wuxuu mar walba lahaa hab-dhaqankiisa leh xeerar xakameeya iyo xuduudo cayiman oo loogu tala-galay in aan laga tallaabsan oo qeexaya dagaalka dhexdiisa, falalka la isla oggol yahay iyo kuwa ay reebban tahay in lagu kaco. Waxaa weliba intaa sii dheeraa xeerarka adag ee ciddii hab-dhaqanka dagaalka xad-gudub ku samaysa lagu qaadi jirey.

Intii aan haddaba kuurka ugu jirney baaritaanka daraasaddan waxa la isla qiray in wax-yeellaynta maatida, oo xad-gudub ku ahayd xeer-dagaaleedka Soomaalida, haddii ay dhacdaba, waanay dhici jirtey mar mar, ay aad dhif u ahayd, hadimadeeduna koobnayd. Waana la isla oggol yahay, markaad aad ugu fiirsato gobollada iyo qabaa'ilka oo dhan, in la dhawro biri-ma-geydada oo iyana inta soo gelaysa la iskaga wada mid yahay, shuruudaheedana la isla wada oggol yahay.

Sidii aynu horeba u soo sheegnay, Soomaalidii hore guud ahaan, meel kastaba ha joogeene, iskaga wada mid bay ahaan jireen xeerarkaasi. Haddiiba se ay dhacdo in ay meelo ku kala duwanaadaan, waxay ahaayeen wax aan sidaa u sii ridnayn oo ah kuwo ay duruufo gaar ahaaneed kallifeen, sida tan Ciisaha oo dadyow badan oo aan Soomaali qaarkood ahayn degaan wadaag la ahaa iyo tan beeraleyda oo hab-nololeedkooda awgiis, xeerar gaar ah u samaystay.

Haddaba xeerka Soomaalidu lahayd ee gobanimada iyo anshaxa ku dhisnaa, ayaa sabab u ahaa in arrimaha dagaalladu aanay inta badan fara-ka-bax noqonnin, si aanay marka dambe nabadda iyo dib-u-heshiisiintu u laalmin. Waayo, haddii xad-gudubka iyo fal-xumadu bataan, waxay keeni karaan in colaaddu noqoto mid aad u riiq dheeraata, oo khasaare badan oo naf iyo maalba lehi halkaasi ka yimaaddaan; taasina waxay ka mid tahay aafooyinka laga ducaysan jirey. Waxa halkaa ku soo aroorta murtida hal-qabsiga u ahayd ducadii dadkii hore foolaadkeeda[112]:

Shan belaayo ayaa laga Alla-baryaa:

1. **Cadho aan laga soo noqonnin**
2. **Caydh aan laga dhaqan**
3. **Cudur aan laga bogsan**
4. **Colaad aan laga heshiin**
5. **Cilmi aan lagu intifaacin**

Intoodaba, haddaba, marka la isku soo hooriyo, tan ugu daran uguna cawaaqibka xumi waa **colaadda aan laga heshiin**. Maxaa yeelay, inta kale waxay saamaynayaan, badanaaba, waa dad kooban. Colaaddu se, dad fara badan iyo dhulal badan ayay siyaalo kala duduwan, toos ama si dadban, u saamaynaysaa. Waxaana sababi kara iyadoo la dhawri waayo inta ay tahay in la dhawro. Taasi oo ah dagaalka dhexdiisa oo biri-ma-geydo la yeelan waayo, iyo iyadoo la dhaafo, laguna dhaqmi waayo dardaarankii abbaanduulihii Soomaaliyeed ee ahaa:

112. Foolaadka = ugu horreeya ama ugu mudan

**- Sidii xeerka Soomaalidu ahaa yaan laga tegin**
**- Tolkeen yaan ceeb loo soo duwin, xishood iyo gobanimo ku dirira**

Tolkiis ninka ceeb u soo duwey wuxuu ka dhigan yahay nin xishoodkii iyo gobanimo-ku-dirirkiiba ka tegey. Mar haddii labadaasi la waayana, talo faro ka haaddey. Kol haddii nin xishoodka iyo gobanimada uu dhigana, isaga wixii ba'aya iyo wixii burburayaba midna waxba kama gelin, saa xilba ma saarra e. Waxaanay arrintiisu ku soo arooraysaa murtidii ahayd:

**Illeyn nimaan xishoonayn dagaal, xeeli kama hayso**

Labadan meeris ee gabayga ah ee uu tiriyey Maxamed Abshir Bacadle ayaa tilmaamaya haddii ay sidaasi dhacdo waxa imanaya ee cawaaqibkoodu ku dambayn doono:

**Hadday laba qabiil dirirto oo, qolo la naafeeyo**
**Maatada kuwii laga qashaa, nabad ma qaataane**

Si xumaha iyo colaadaha looga heshiiyo, marka horeba waa in la iska jiraa wax allaale wixii utun iyo uur-ku-taallo reebaya; oo maskaxda had iyo jeerba lagu hayaa, si kasta oo dagaal loo galo, dil kasta oo dhacaba, in mar uun nabadi iman doonto. Markaa, ninka xad-gudbey ama xeerkii dhaafay markii dagaalku socdey ee gobannimadii Soomaalida iyo Islaannimada labadaba ka tallaabsaday, isagu si xun ayuun buu ku dambayn oo dhaxalkiisu noqon, oo waa tii laga yiri:

**Ninba geedkuu beeruu midhihiisa gurtaa**

Tafiirtiisa taariikhdooduna mugdi iyo gunnimo ayuun bay ku dambaysaa, iyo gabadhooda oo guur beesha.

Su'aasha ah xeerarka aanu daraasaddan ku soo qaadaa-dhignay maxay sidii hore ugu shaqayn waayeen waqtiga la joogo markii dagaallada sokeeye ay ka dillaaceen dalka Soomaaliya, jawaabteedu waa mid cid walba u furan.

Guddiga Caalamiga ah ee Laanqayrta Cas

Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed

ICRC/SRCS T96.59/402 12 Printed in Nairobi